WARGEYSKA DALKA

Wargeyska Dalka, Waa Wargeys ay soo saarto Wasaardda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Email:wargeyska.dalka1973@gmail.com
Email:director.dalkajournal@moi.gov.so

Twitter:dalkajournal
CADADKA 591-AAD

## TUSMADA

XULKA WARARKA WARGEYSKA BOGGA 2-3aad
GUUXA SHACABKA BOGGA 4-aad
FAALLO & FALANQEYN BOGGA 5-aad
ISLAAMKA & NOLOSHA BOGGA 6-aad
ARRIMAHA BULSHADA BOGGA 7-aad
DHAQALAHA & GANACSIGA BOGGA 8-aad
QUBANAHA KHAWAARIIJTA BOGGA 9-aad
DHAQANKA & SUUGAANTA BOGGA 10-aad
CIYAARAHA & DHALINYARADA BOGGA 11-aad
FAAFINTA RASMIGA BOGGA -12aad

# MADAXWEYNE XASAN"KHAAWARIJTA WAXAA LAGALA DAGAALAMI DOONAA FIKIRKA MARKA UU DHAMAADO KAN MILITERIGA"

Bogga 2-aad



## R/WASAARAHA XFS OO FARAY GOLAH WASIIRRADA IYO GUUD AHAAN HAY'ADAHA DOWLADDA IN AY KA QAYB QAATAAN HALGANKA LAGU CIRIBTIRAYO KHAWAARIJTA

Bogga 2-aad

Shirka Golaha Wasiirrada XFS oo uu guddoominayey Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Barre, ayuu ku faray Hay'adaha Dowladda iyo qeybaha kala duwan ee bulshada in ay ka qeyb qaataan halganka socda ee dalka looga ciribtirayo Khawaarijta.

## GOLAHA AQALKA SARE OO AKHRINTA KOOWAAD MARSIIYAY HINDISE SHARCIYEEDKA XAFIISKA HANTI-DHOWRKA GUUD EE JFS

Bogga 2-aad

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo ay wehliyaan ku-xigeennadiisa, ayaa shir guddoomiyay kalfadhiga Saddexaad kulankiisa 5-aad ee Golaha Aqalka Sare oo ajandihiisu ahaa Akhrinta koowaad ee Hindise Sharciyeedka Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee JFS.

## CIIDANKA XOOGGA OO HOWLGAL KA DHACAY GALGADUUD KU KHAARAJIYAY 5 KA TIRSAN KHAWAARIJTA

Bogga 2-aad

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ayaa howlgallo ay ka fuliyeen deegaannada Garileey iyo Cali-Yabaal ee Gobolka Galgaduud ku dilay 5 dhagarqabe oo tirsan Khawaarijta Alshabaab sida uu SONNA u xaqiijiyay Afhayeenka wasaaradda Gaashaandhigga Generaal Cali Caanood.


## ILAALINTA AWOODDA SHARCIGA SHACABKA LEH

Bogga 5-aad

## QASHINKA IYO BACAHA LAGU TUURO BADAHA

Bogga 7-aad

## SAWIRKA MAANTA




## GALMUDUG GABBAADKA KHAWAARIIJTA MA NOQON KARTO.

# XULKA

## WARARKA WARGEYSKA

## TIXANAHA SHEEKADA MAANO FAAY (QEYBTA 52-AAD)

Bogga 10-aad

Leyla intay fursaddaas ka faa'iideysatay bay tiri, "Umaa, gebertan wixii sidaas la nakhatay ma kaseeysiin?"

"Ma kasi karo gabarteey. Kaas amar waayebee. Macallin waa u khabtay, warqaasaa loo dhigay, takhtar waa loo geeyey, si kasta waa loola hadlay, horlee u soo darseheesaa. Waxaaneyto cayuun aan u mudaas."

"Umaa waxaa dhan ma eh. Gebertaan wixii saas la nakhatay waxaa waaye; gebertaan Iikar ma rabto. Haddii lagu darana horlee u sii khafiifeesaa, usna waa ku dhibtoonaa, ma mudaayo in arooskaas lagu faa'iidaayo."

Aay-Caddeey, sidii qof meel nabar uga yiil laga taabtay bay intay soo jeesatay tiri, "Wallaahi an naftirkey igaarkaas ma u rabin, laakiin, adoogeedaa ku daray, an taladey haddii ahaa leheed, abtigeeda igaarkiis dhalay aan ku dari lahaa."

"Kaasna ma rabto ummaa."

Habartii intay dhabannada qabsatay, bay

# MADAXWEYNE XASAN"KHAAWARIJTA WAXAA LAGALA DAGAALAMI DOONAA FIKIRKA MARKA UU DHAMAADO KAN MILITERIGA"



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud oo ka qeyb galay dood su'aalo waydiin ah ayaa sheegay marka uu dhamaado dagaalka Khawaarijta in sidoo kale fikir ahaan loola dagaalami doono.

"Khaawarijta waxaa lagala dagaalami doonaa Fikirka, marka uu dhamaado kan Militeriga, meeshii fikir qaloocan iyo balaayo lagu faafinayo waa laga hortagaa" ayuu yiri madaxweyne Xasan Sheekh.

Madaxweynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa tilmaamay sida dowladda iyo shacabka soomaaliyeed ay u doonayaan in ay dhaqsi dalka uga xoreeyaan Khawaarijta iyo qorsheyaasha xaslinta, dib u heshiisiinta iyo horumarinta isugu jira ee laga hirgalanayo deegaannada laga xoreynayo argagixisada.

"Waxaa iga go'an in aan tago deegaan walba oo Khawaarijta laga xoreeyo sidii aan horayba u tagay iyada oo la ii sheegayo in amnigeygu uu halis ku jiro.

Ma jirto sabab aan dib isugu dhigo iyadoo wiilal dhalinyaro ah ay naftooda hurayaan". ayuu yiri Madaxweyne Xasan.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud oo ah Taliyaha guud ee Ciidamada Qalabka Sida ayaa magaalada Dhuusamareeb u jooga dhameystirka wajiga koowaad ee dagaalka Khawaarijta, iyadoo sidoo kale dhawaan Jubbaland iyo Koonfurta Galbeed ay ka bilaaban doonaan dagaalka wajiga labaad ee ka dhanka ah khawaarijta.

DHANKA KALE, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa u magacaabay Mudane Cabdixakiim Maxamed Yuusuf Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada Qaranka.

Mudane Cabdixakiim waxa uu ahaa la-taliyaha dhinaca siyaasadda ee madaxweynaha, waxa uuna leeyahay khibrad shaqo oo kor u dhaafaysa 20 sanadood oo ku aaddan dhinacyada horumarinta hay'adaha dowladda, maamul-wanaagga, tayeynta dowlad-goboleedyada iyo bulshada ay colaaduhu saameeyeen iyo xuquuqda aadanaha.

Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa Alle uga baryey Agaasimaha cusub ee Madaxtooyada Qaranka in uu u fududeeyo mas'uuliyadda culus ee uu u magacaabay, waxa uuna kula dardaarmay in uu si hufan oo daacadnimo leh ugu adeego Qaranka.

# R/WASAARAHA XFS OO FARAY GOLAH WASIIRRADA IYO GUUD AHAAN HAY'ADAHA DOWLADDA IN AY KA QAYB QAATAAN HALGANKA LAGU CIRIBTIRAYO KHAWAARIJTA



Shirka Golaha Wasiirrada XFS oo uu guddoominayey Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Barre, ayuu ku faray Hay'adaha Dowladda iyo qeybaha kala duwan ee bulshada in ay ka qeyb qaataan halganka socda ee dalka looga ciribtirayo Khawaarijta.

Golaha ayaa warbixin ku saabsan howlgallada socda ka dhageystay Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Gereraal Ibraahim Sheekh Muxyadiin oo tilmaamay in uu socdo dagaal looga sifeynaayo Khawaarijta deegaannada ay kaga harsan yihiin Gobollada Dhexe ee dalka.

R/wasaare Xamse oo shirka ka hadlay ayaa bogaadiyey go'aanka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud uu ku gaarey in uu dagaalka ka hoggaamiyo jiidaha hore, si dadweynaha iyo Ciidamada Qalabka Sida loogu dhiirrigeliyo halganka dalka lagaga ciribtirayo Khawaarijta.

"Waxaan bogaadinayaa ciidamada Qaran ee geesiyaasha ah oo dalkeenna ka wada Jihaad ka dhan ah Khawaarijta, waxa ay sameynayaan taariikh cusub oo mar labaad looga xoroobayo argagixiso gumeysi ku haya dadkeenna".Ayuu yiri Ra'iisul Wasaare Xamsa.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa xusay in dalku uu ku jiro dagaal la rabo qof walba in uu qaato doorka kaga aadden, si la isaga dulqaado culeyska Khawaarijta ee naafeeyey noloshii iyo horumarkii ummadda Soomaaliyeed.

Kulanka Golaha Wasiirrada ayaa sidoo kale lagu meelmariyey Hindise Sharciyeedka Da'yarta Soomaaliyeed iyo Xeer nidaamiyaha Maareynta Hantida danta guud iyo agabka dowladda.

# GOLAHA AQALKA SARE OO AKHRINTA KOOWAAD MARSIIYAY HINDISE SHARCIYEEDKA XAFIISKA HANTI-DHOWRKA GUUD EE JFS



Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo ay wehliyaan ku-xigeennadiisa, ayaa shir guddoomiyay kalfadhiga Saddexaad kulankiisa 5-aad ee Golaha Aqalka Sare oo ajandihiisu ahaa Akhrinta koowaad ee Hindise Sharciyeedka Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee JFS.

Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda XFS, Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange, ayaa Sanatarrada Aqalka Sare dulmar guud ugu sameeyay sharciga Hanti dhowrka Guud ee Qaranka, waxyaabaha uu sugayo iyo muhiimaddiisa.

Guddoomiye Cabdi Xaashi oo kulanka soo xiray ayaa Guddiga Maaliyadda Aqalka Sare faray inay ka howl galaan Hindise Sharciyeedka Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Qaranka, kana gutaan waajibaadka dastuuriga ah ee saaran isla markaana fadhiga guud ee Golaha ay dib ugu soo celiyaan.

# CIIDANKA XOOGGA OO HOWLGAL KA DHACAY GALGADUUD KU KHAARAJIYAY 5 KA TIRSAN KHAWAARIJTA



Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ayaa howlgallo ay ka fuliyeen deegaannada Garileey iyo Cali-Yabaal ee Gobolka Galgaduud ku dilay 5 dhagarqabe oo tirsan Khawaarijta Alshabaab sida uu SONNA u xaqiijiyay Afhayeenka wasaaradda Gaashaandhigga Generaal Cali Caanood.

General Cali Caanood ayaa sidoo kale sheegay in deegaanka Jirjir-xiireey oo u dhaxeeya Ruun-nirgood iyo Cali-Heelle ee kala ah gobollada Shabeellaha dhexe iyo Galgaduud laga saaray Khawaarijtii keymahaas ku dhax-dhuumanayay.

Afhayeenka wasaaradda Gaashaandhigga ayaa sidoo kale sheegay in ciidanka howgallo culus ka wadaan dhulka keymaha ah, isagoo sheegay in ciidankaas ku wajahan yihiin magaalooyinka Ceelbuur iyo Galhareeri ee ah labada degmo ee kali ah gobolkaas ee ku haray gacanta Khawaarijta Alshabaab.

Ciidanka Xoogga Dalka oo kaa shaanaya saaxiibada caalamiga ayaa howlgallo lagu ciribtirayo Khawaarijta ka wada goobaha ku dhuumaaleysanayaan Khawaarijta, iyagoo ka saaray dhulal badan oo argagixisada ku dhibaateyn jirtay shacabka Soomaaliyeed.

# WASIIRKA WAXBARASHADA XFS OO LA KULMAY SHEEKHA AL-AZHAR AL-SHARIIF IYO MADAX KALE



Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr. Faarax Sheekh C/qaadir ayaa magaalada Qaahira kula klmay Sheekha weyn ee Al-Azhar Al-Shariif Dr. Axmed Al-Tayeb iyo madax kale oo ka socotay Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Masar.

Kulankaasi oo uu goob joog ka ahaa safiirka Soomaaliya ee Masar Danjire Ilyaas Sheekh Cumar Abuu Bakar waxaa looga hadlay sidii kor loogu qaadi lahaa iskaashiga labada dale ee Soomaaliya iyo Masar iyo dardar galinta taageerada Al-Azhar ee dhanka Soomaaliya.

Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr. Faarax Sheekh C/qaadir ayaa bogaadiyay doorka Al-Azhar Al-Shariif ee ku aaddan faafinta muuqaalka saxda ah ee diinta Islaamka, iyo ka hortagga muuqaallada xagjirka ah ee ay faafiyaan kooxaha argagixisada ah, isagoo carrabka ku dhuftay in manhajka Al-Azhar Al-Shariif uu gacan weyn ka geystay ku-dhaqanka Soomaalida. luqadda Carabiga, ilaalinta aqoonsiga Islaamka, iska caabinta gumeysiga iyo la dagaallanka xagjirnimada .

Sheekha Al-Azhar Al-Shariif Dr. Axmed Al-Tayeb ayaa ammaanay dadaalka Soomaaliya ay ku bixiyeen la dagaalanka kooxaha argagixisada iyo la ka hortagga xagjirnimada iyo afkaarta madawga ah ee kooxahaasi.

Danjiraha Soomaaliya ahna Wakiilka joogtada ah ee Jaamacadda Carabta oo u waramay warbaahinta Qaranka ayaa sheegay in labada dhinac ay isku afgarteen in la joogteeyo deeqaha waxbarasho ee loo fidinaayo dadka Soomaaliyeed iyo howlaha kale ee lagama maarmaanka u ah dowladnimada Soomaaliya.

# WASIIR KU-XIGEENKA CAAFIMAADKA XFS OO SHIR MUHIIM AH KAGA QEYB GALAY DALKA HINDIYA



Wasiirka ku-xigeenka wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee xukuumadda fedaraalka Soomaaliya, mudane Xildhibaan Maxamed Xasan Bullaale oo uu wehlinayo Danjiraha Dowladda Soomaaliya u jooga dalka Hindiya mudane Axmed Cali Daahir, ayaa kaga qayb galay magaalada Gandhinagar ee gobolka Gujarat kulanka G20 ee halku dhigiisu yahay "One Earth One Health.


Wasiirka ayaa madaxda dalalka Afrika iyo kuwa kale ee caalamka u jeediyay khudbad uu kula wadaagay xaaladda, caafimaadka dalka Soomaaliya iyo qaybabaha la iska kaashan karo si bulshooyinka wadamada guud ahaan u helaan caafimaad haqab-tiran iyaga oo aan waajihin culeys dhaqaale.

Wasiir ku-xigeenka iyo wafdigiisa ayaa sidoo kale ka qayb galay daahfurka shir waynaha (WHO Global Summit on Traditional Medicine) iyo dhacdooyin kale oo garab socoday kulanka.

Shirwaynaha ayaa waxaa ka qayb-galaya madax iyo wufuud ka kala socota ilaa 70 waddan oo caalamka ah iyo hayado caalami ah Agaasimaha Guud ee Hay'adda caafimaadka adduunka Dr. Tedros ayaa kamid ah madaxda goob joogga ka ah shirwaynaha, isaga oo ka jeediyay khudbad taabanaysay ahmiyadda ay leedahay iskaashiga waddamada si sare loogu qaado badqabka bulshooyinka caalamka Wafdi uu Hoggaaminayo.

Wasiirka ku xigeenka wasaaradda Caafimaad iyo Daryeelka bulshada H.E Xildhibaan Maxamed Xassan Bullaale ayaa dalka Hindiya ku joogi doona booqasho rasmi ah oo 3 maalin qaadan doonta.

# XI JINPING OO K/AFRIKA KAGA QEYB GALAYA KULANKA DALALKA KU BOHOOBAY URURKA BRICS



Madaxweynaha Shiinaha Xi Jinping ayaa lagu wadaa in uu ka qeyb galo shir madaxeedka wadamada ku bahoobay ururka BRICS, kaas oo ka furmaya Dalka Koonfur Afrika.

Madaxweyne Xi Jinping waxa uu ka qeyb geli doonaa Shir Madaxeedka 15-aad ee Ururka BRICS oo lagu qaban doono magaalada Johannesburg ee dalka Koonfur Afrika, kaas oo socon doona 21-ka ilaa 24-ka Agoosto,waxaana ka qeybgali doona Shanta wadan ee Ururka BRICS sida Brazil, Russia, India, China iyo South Africa.

Madaxweynaha Shiinaha ayaa horay u booqday Koonfur Afrika sanadkii 2018-kii isagoo doonaayey inuu sare u qaado xiriirka diblomaasiyadeed iyo kan dhaqaale ee dalkiisa uu la leeyahay Afrika.

Madaxweynaha Ruushka Vladimir Putin oo wajahaya waaran lagu soo xirayo ayaa ka qeyb qaadan doona muuqaal ahaan kulankaasi,halkii uu shaqsi ahaan uga qeyb gali lahaa.

Guud ahaan 69 wadan ayaa lagu casuumay shir madaxeedka Koonfur Afrika oo ay ku jiraan dhammaan dowladaha Afrika, waxaana la filayaa in la ballaariyo ajandaha ugu sarreeya.

Dalal ay ka mid yihiin Algeria, Saudi Arabia, Argentina iyo Ethiopia ayaa muujiyay xiisaha ay u hayaan ku biiridda kooxdaasi si rasmi ah ama si aan rasmi ahayn.

Dalalka ku bohoobay Ururka BRICS ayaa doonaya in ay muujiyaan awood lamid ah tan reer Galbeedka,waxaana lagu tiriyaa dalalka heysta rubuc meelood dhaqaalaha dunida

# IN KA BADAN 60 MUHAAJIRIIN AH OO KU DHINTAY BADDA U DHOW XEEBTA CAPE VERDE



In ka badan 60 qof ayaa laga cabsi qabaa in ay dhinteen ka dib markii dooni alwaax ah oo ay la socdeen dad muhaajiriin ah laga helay xeebaha Cape Verde ee galbeedka Afrika.

Afhayeen u hadlay Hay'adda Socdaalka Adduunka ee IOM ayaa sheehay on soddon iyo siddeed qof oo ay ku jiraan afar carruur oo da'doodu u dhaxeyso 12-16 la soo badbaadiyay.

Doonta ayaa ka soo baxday tuulada Fasse Boye ee dalka Senegal 10-kii bishii Luulyo iyadoo ay saarnaayeen 101 qof, sida ay sheegtay wasaaradda arrimaha dibadda ee Senegal, iyadoo soo xiganaysa dad badbaaday.


Doontaan oo muddo ka badan bil ku jirtay badda ayaa maalinimadii isniinta ee la soo dhaafay lagu arkay meel 320km u jirta deegaan badeedka Sal oo ka tirsan Cape Verde, waxaana dadkaasi tahriibka ah ee badbaaday qeylo dhaan u sameeyay dooni kaluumaysi oo Isbaanish ah.

Saraakiisha Cape Verde ayaa ku baaqay in tallaabo caalami ah laga qaado socdaalka sharci darada ah,si looga hortago khasaaraha nafeed ee soo gaaraya dadka ku safra badaha ee nolo raadiska ah.

Dowladda Senegaal ayaa codsatay in lagala shaqeeyo soo celinta dadka tahriibka ah ee lagu hayo Cape Verde ,waxaana sidoo kale dadka badbaaday ku jira kwo u dhasdhay Sierra Leone iyo Guinea-Bissau.

Jamhuuriyadda Cape Verde ama Cabo Verde, waa jasiirad ku taal badhtamaha badweynta Atlantic,waxayna ka kooban tahay toban jasiiradood oo baaxadda dhuleed uu gaarayo ilaa 4,033 kiiloomitir laba jibaaran,halka tirada dadka lagu qiyaasay 587,925.

# MARKAB LA WEERARAY OO XIISAD KA DHEX-ABUURAY TURKEY IYO RUSSIA



ANKARA — Turkey ayaa ugu digtay Moscow inay ka fogaato xiisad kale ka dib markii markab xamuul ah oo laga leeyahay Turkiga ay weerareen ciidamada badda Ruushka toddobaadkii hore, waxaa sidaas sheegay xafiiska madaxweyne Recep Tayyip Erdogan.

"Kadib faragelintii (Ruushka), dadkii nagala soo xiriiray Ruushka waxaa looga digay inay ka fogaadaan isku daygaas oo kale, taasi oo kasii dareysa xiisadda Badda Madow," ayay tiri madaxtooyada Turkiga, kadib maalmo ay ka aamusneyd dhacdadan.

Markabka Sukru Okan ayaa sitay calanka Palau markii ay rasaas ku fureen ciidamada badda Ruushka Axaddii hore.

Militariga Ruushka ayaa kadib koray markabka si ay baaritaan ugu sameeyaan, kahor inta aanay u ogolaan inuu u shareecdo xeebta Izmail ee Ukraine, oo ah tan laga dhoofiyo dallaga ugu badan ee beeraha.

Dhacdadan ayaa timid ayada oo ay sii kordheen weeraradа ka dhaca Badda Madow, kadib markii Ruushka uu ka baxay heshiiskii haruurka Ukraine bishii tagtay

Turkey ayaa gacan ka gaysatay dhex-dhexaadinta heshiiskan oo ay taageereysay QM, ayada oo adeegsaneysa xiriirka wanaagsan ee kala dhaxeeya Moscow iyo Kyiv.

Hase yeeshee xafiiska madaxweyne Erdogan ayaa cambaareyn kala kulmay gudaha dalka sababo la xiriira inaanu waxba ka dhihin weerarka.

Xafiiska ayaa iska caabiyey dhalleeceynta Khamiistii, isaga oo ku dooday in farsamo ahayn ay aheyd in Palau ay ka jawaabto dhacdada.

“Xitaa haddii milkiilaha markabka Sukru Okan uu yahay Turkish, markabka ma ahan mid sita calanka Turkey,” ayey tiri madaxtooyada.

“Marka la eego sharciga caalamiga, ‘calanka dalka’ ayaa ka muhiimsan magaca iyo shaqsiyadda shaqaalaha.”

Palau waa jasiirad ku taalla badweynta Pacific oo calankeeda ay inta badan isticmaalaan shirkadaha maraakiibta, si ay si xor ah u galaan dekedaha caalamiga ah.

© AFP

# ETHIOPIA: 26 QOF OO KU DHINTAY DUQAYN CIRKA AH OO KA DHACDAY GOBOLKA AMXAARADA



Shaqaalaha caafimaadka ee dalka Itoobiya ayaa sheegay in ugu yaraan 26 qof oo rayid ah ay ku dhinteen duqayn diyaaradaha aan duuliyaha wadin oo ka dhacday gobolka Amxaarada.

Ciidamada federaalka dawladda Itoobiya iyo maleeshiyaadka gobolka ayaa isla safnaa colaaddii ka dhacday gobolka Tigray, hase yeeshee labadaasi dhinac ayaa dagaal uu ka dhexeeyey afartii bilood ee lasoo dhaafay.

Weerarkan duqaynta ah oo dhacay Axaddii ayaa ka dhacay magaalada Finote Selam, oo ka tirsan Galbeedka Gojam ee gobolka Amxaarada.

Dhakhtar ku sugan Finote Selam oo codsaday inaan magaciisa la sheegin ayaa sheegay in dadka kusoo dhaawacmay weerarkaas ay duhurnimadii soo gaareen cisbitaalka.

Maleeshiyaadka Amxaarada ee loo yaqaan FANO ayaa taagerayey ciidamada dawladda xilligii uu socday dagaalkii ay kaga soo horjeedeen xoogagga Tigray.

Dagaalka FANO iyo ciidanka ayaa bilowday bishii April kadib markii dawladda federaalku ay amartay in maleeshiyaadka gobollada iyo daro ciidamada dawladda ee milatariga ama booliiska.

Hay’adda Xuquuqda Aadanaha ee dalka Itoobiya ayaa sheegtay inay soo gaareen warar lagu kalsoon yahay oo ah duqayn ka dhacday Finote Selam iyo laba goobood oo kale oo ka tirsan gobolka Amxaarada oo kala ah Burie and Debre Birhan.

Dawladda Itoobiya aya sheegtay in la qabtay 23 qof arrin la xiriirta waxa ay ugu yeedhay ficillo sharcidarro ah Jimcihihii, toban maalmood kadib markii dalkaasi looga dhowaaqay xaaladda degdegga ah.

Dadka la qabtay waxaa ku jira mudane ka tirsan baarlamaanka oo lagu magacaabo Christian Tadele, iyo tifaftiraha barta internetka ee Alpha Media, oo lagu magacaabo Bekalu Alamrew.

WARGEYSKA DALKA
WARGEYSA DALKA: waa wargeys ay soo saarto Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Dalxiiska Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# GUUXA SHACABKA

## DHIBAATADA TAHRIIBKA IYO XANUUNKA AY KU HEYSO DHALLINYARADA SOOMAALIYEED?



Baraha bulshada siiba kuwa soomaalidu ku wada xiriirto waxaa mar walba ka soo muuqda wiilal iyo gabdho soomaaliyeed oo u gacan galay manaxeyaal Liibiyaan ah oo lagu magacaabo magafeyaal oo ku qabsada marka ay ku guda jiraan safari tahriib sibiimeeyn ah oo ay dhulkooda ku maraan waxaana dhallintaa loo jirdilaa si ba'an oo ka baxsan bini'aadminimada iyadoo laga rabo lacag.

"Wiilkeyga laba jeer ayaan ka bixiyey lacag welina waa la heystaa mar walbana waxaa la ii soo diraa telefoon isagoo la jirdilayo mana awoodo in aan wax u taro oo aan ka bixiyo markii saddexaad oo hadda xitaa ma hayo guri kale oo aan u gado" ayey tiri Faadumo Cabdi Maxamed oo ka mid ah waalidiinta ay carruurtoodu tahriibka ku silicsan yihiin.

" Aniga waxaan joogaa Talyaaniga laakiin waan curyaamay oo intii aan saarnaa doontii I tahriibineysay ayaa magafeyaashii xabbad igu dhufteen ..dadkii nala socday qaarkoodna badda ku tureen " ayuu yiri Maxamed Deeq Cabdi oo muddo saddex sano ah ku jira xaalad nolol iyo geeri midna aheyn markii uu noqday( Paralyze ) aan dhaqaajin Karin dhabarka kana curyaamay .

Kumanaan dhallinyaro oo ay ku jiraan Soomaali ayaa sanad walba ku dhinta ama lagu dhibaateeyaa tahriib ay u galaan si ay u gaaraan dalalka Yurub iyagoo raadinaya nolosha dalka ee ay ku jiraan mid ka duwan waxaana inta badan ku soo jiida muuqaalo qurux badan iyo meelo waxaagsan oo ay isku soo sawiraan saaxibadoodii hore dalka uga tagay oo meelihii ay tageen uga dhigaya meelo ay kala kulmeen nolol wanaagsan.

Soo jiidashadaas aan inta badan runta aheyn ayaa ku kallifta dhallin badan in mararka qaar ay ka dhuuntaan waalidkood una bareeraan marista bado halis ah oo ay ku le'daan iyagoo heli kara in dalkooda ay nolol iyo shaqo abuur ka sameystaan.

"Anigu dhowr jeer ayaan nafteyda halis u galiyey dhal-dhalaalkaas beenta ah..laaakin waxaan yaqiinsaday in tahriibka uu yahay in aad u bareerto goynta naftaada adoo is leh wax hel' ayuu yiri C/raxmaan Xasan Guure oo markii ugu dambeysay tahriibkiisa oo ahaa saddex jeer isagoo naf xun ku jirto laga soo dejiyey xeebaha liibiya markii doontii uu la socday dadkii saarnaa badankooda ay ku dhinta inta u dhaxeysa Liibiya iyo Talyaaniga..markii halkaas la keenay ka dibna go'aansaday in uusan mar dambe tahriib galin una soo laabatay dalkiisa>

C/raxmaan haatan dadka dhallinyarada ah wuxuu ka waaniyaa tahriibka wuxuuna maqaayad yar ku leeyahay wadada Maka Al Mukarama wuxuuna xitaa shaqo abuur u sameyeeyey dhallinyaro kale oo tahriibi laheyd .

"Maxay yihiin sababaha dhallinyarada ku qasba in ay tahriibaan?" ayaan weydiiyey Shamso Xasan Cilmi oo ka tirsan ururada dhallinyarada ee ka jira magaalada Muqdisho, waxay ii sheegtay in sababao dhowr ah oo keenaya arrintan ay jiraan sida : Shaqo la'aanta , dhallinta oo qaata muuqaalo qaldan oo laga bixiyo nolosha qurbaha oo ah in wax walba laga heli qurbaha iyo wacyi galin la'aan dhallinyarada aan lagu wacyigalin in ay dalkooda ku kalsoonaadaan.

"Dhallinyarada badankooda waxaa marin habaabiya kuwa jooga dibadda oo dalalka ay joogaan ugu muujiya dhallinyarada in ay yihiin meelo iska barwaaqo ..dalkana uga dhiga meel lagu baaba'san yahay oo aan nolol ka jirin "ayey tiri Shamso oo dhallinayarada u soo jeedisay in ay dalkooda ku kalsoonaadaan .

"Dalalka ay dhallinyarada u hanqaltaagayaan dad baa leh oo dhistay ee igana kooda sidaas oo kale ha u dhistaan " ayey tiri.

Si dhibaatadan xal loogu helo maxaa loo baahan yahay ayaan weydiiyey Shamso waxayna sheegtay in loo baahan yahay in dhallinyarada ay helaan fursado shaqo oo ay helaaan si ay dalka ugu negaadaan..sidoo kalena dhallinyarada ka baxaeysa dugsiyada iyo jaamacada aaney noqon kuwo darbiyada ku fekera ee loo baahan yahay in dowladda, ganacsatada iyo dadka awoodda u leh in ay fursado shaqo abuuraan ku dadaalan in shaqo abuur dalka laga sameeyo.

"Qofka dhallinayarada ah ee jaamacad ama dugsi sare ka baxay haddii uu og yahay in aqoontiisa uu wax ku heli karo ma imaaneyso fikradda ah in uu tahriibo laakiin haddii dhallinyaradii fursadihii shaqo, kuwii siyaasadeed iyo dhaqaaleba dadkii ka waaweynaa ay weli ka boobayaan taasi waxay keeneysaa in aaney dalkoodiiba iimaanka ku qabi Karin" ayey Tiri.

WQ: Mohamed Shiil

## DHIBAATADA MAKE UP-KU LEEYAHAY OO LA OGAADAY



Soomaaliya, waxaa ku soo badanayo waxa loo yaqaan (Make up artist) oo loo yaqaan qofka mariya ama ka ganacsada make-up-ka.

Qurxinta wajiga waxaa aad u isticmaalo hablaha Soomaaliyeed, kuwaas oo aad ka arki karto baraha bulshada sida, facebook iyo instagram.

Muhiimadda make up-ka loo marsado ayaa ah, qofka marka uu marsado waxuu u ekaanayaa qof qurux badan oo dabiici ah, waxa uuna yeelanayaa qofka soo jiidasho.

Sidoo kale, qofka ayaa dareemaya kalsooni nafeed, oo mala awaal ah. Marsashada make-up-ka aadka u badan ayaa sababo cudurro badan sida:

1: Caabuqa indhaha: Marka wajiga laguu marinayo make up-ka, ayaa waxa soo gaarayo hareeraha indhaha make-up yar.

Sidoo kale, koritaanka isha ayaa yaraato, waxeyna noqotaa taranka bakteeri u horseedo, cuncun iyo caabuq.

2: Finan iyo dulduleello waa weyn: Maqaarkaagu waa qeyb aad u Muhiim ah oo jirkaaga ka mid ah sida unugyada kale, waxay sidoo kale u baahan tahay inay neefsato oo ay korto.

Markaad maqaarkaaga mariso make-up, waxaa xireysaa halka uu wajigaaga ka neefsan lahaa, taasoo abuuri karto dul-duleello waa weyn iyo finan buur-buuran oo casaan ah.

3: Madax xanuun: Kiimikooyinka sida Diazolidinyl urea iyo DMDM Hydantoin, oo labaduba u muuqda inay sii deyn karaan formaldehyde, waa maaddo caan ah oo ka mid ah alaabada badan ee la isku qurxiyo.

Kiimikooyinkan ayaa loo yaqaanay inay keenaan madax xanuun, xanaaqa xuubka iyo inay waxyeello u gaystaan indhaha.

4: xasaasiyad: Kiimikooyinka loo yaqaan Parabens oo ay ka mid yihiin ethyl-paraben, butyl-paraben, iyo isopropyl-paraben ayaa loo isticmaalaa sidii loo ilaaliyo inay ka hortagaan koritaanka bakteeriyada ee is-qurxinta.

Parabens-ku waxay sababi karaan xasaasiyado noocyo kala duwan ah sida cuncun maqaarka ah iyo nabarro maqaarka ku dhaca. Xasaasiyad kale oo caadi ah oo la isku qurxiyo ayaa ah Salicylate, kaas oo sababi kara inuu ku faafo finanka xanuunka leh ama finanka jirka haddii aad leedahay maqaar xasaasi ah.

5: Gabow/waji miinyo yeeshtay: Markaad isticmaasho alaabada maqaarka muddo dheer, kiimikooyinka waxay waxyeeleeyaan maqaarkaaga.

Waqti ka dib, waxaad arkeysaa calaamadaha gabowga maqaarka oo jilca laalaab ama qallooc wejigaaga.

6: Isku dheeli tir la'aanta hormoonka: Isticmaalka is-qurxinta muddada-dheer waxay saameyn ku yeelan kartaa nidaamka endocrine-ga waxayna faragelin ku sameyn kartaa shaqada qanjirka tayroodh.

Triclosan waa walxo kiimiko ah oo badanaa la isticmaalo waxaana laga heli karaa alaabada sida xoqida findillaaca finanka iyo kaar-gooyeyaasha si looga ilaaliyo jeermiga. Isticmaal joogto ah, triclosan ayaa jirka ka maqnaata kuna ururaya jirkaaga waxayna saameyn ku yeelanaysaa qanjirka tayroodh ee sababa isu dheelitir la'aanta dheecaanka hoormoonka.

Tani waxay kuu horseedi kartaa xaalado la xiriira tayroodh sida madax xanuun, miisaan culeys, iyo niyad jab.

7: Kansar: Make up-ka waxaa ku jira maadoyin dhaliya cudurka kansarka kuwaas oo kala ah: Diazolidinyl urea, DMDM Hydantoin, formaldehyde, Parabens, ethylparaben, butyl-paraben, isopropylparaben, Salicylate & Triclosan.

WQ: Muhsin Mohamed Abdulle (Fanah)

## DHULAL QANI AH IYO DAD FAQRI KA AH



Waxaa jira habab badan oo ay waddamada Afrika ku kordhin karaan dhaqaalahododa, laakiin kuwa ugu rajo weyn waxaa ka mid ah:-

Maalgelinta waxbarashada: Waxbarashadu waa hormuudka kobaca dhaqaalaha iyo horumarka.

waddamada Afrika waxay ku qalabayn karaan muwaadiniintooda xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan yihiin si ay uga qayb qaataan dhaqaalaha casriga ah iyo horumarinta hal-abuurka.

Tan waxa lagu samayn karaa hindisayaal ay ka mid yihiin balaarinta helitaanka waxbarasho tayo leh, kordhinta maalgelinta dugsiyada, jaamacadaha iyo mudnaanta STEM (sayniska, tignoolajiyada, injineernimada, iyo xisaabta iyo waxbarashada.

Horumarinta kaabayaasha: Kaabayaal ku filan ayaa lagama maarmaan u ah kobaca dhaqaale kasta.

Wadamada Afrika waxay maalgashi ku sameyn karaan kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, buundooyinka, dekedaha, iyo garoomada diyaaradaha si loo hagaajiyo isku xirka iyo fududaynta ganacsiga. Tani waxay ka caawin kartaa ganacsiyada inay si hufan u shaqeeyaan oo ay kordhiyaan dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha.

Dhiirigelinta Maalgashiga Shisheeye: Maalgashiga Shisheeye wuxuu u keeni karaa raasumaal, teknoloji, iyo khibrad u leh waddamada Afrika, kuwaas oo gacan ka geysan kara in la dhaqaajiyo kobaca dhaqaalaha iyo horumarka.

Dawladuhu waxay dhiirigelin karaan maalgashiga shisheeye iyagoo abuuraya jawi ganacsi oo wanaagsan, oo ay ku jiraan hindiseyaal ay ka mid yihiin fududaynta xeerarka ku dhisan wada-ogol oo ay la yeeshaan shirkadaha shisheeye si' loo gaaro isku filnaan dhaqaalo.

dalal afrika nooc walba oo kheyraad ah ayuu ku duugan balse weli meysan fahmin ilaha dhaqaale ay ku fadhiyaan ,taasi waxay sababtay in maalin kasta ay ku tirsanadaan reer galbeedka.

Kor u qaadida hal-abuurka ganacsi: Ganacsigu waxa uu kicin karaa hal-abuurnimo iyo abuurista fursado dhaqaale oo cusub.

Dowladaha Afrika waxay ku taageeri karaan hal-abuurka ganacsi iyagoo siinaya fursad ay ku helaan raasamaal, tababaro, iyo agabyo kale si ay uga caawiyaan ganacsatada inay guuleystaan.

Maalgelinta kheyraadka dabiiciga ah Dalal badan oo Afrikaan ah ayaa qani ku ah kheyraadka dabiiciga ah sida saliidda, macdanta, iyo wax soo saarka beeraha.

Maalgelinta horumarinta khayraadkaas, dawladaha Afrika waxay ka faa'iideysan karaan ilo cusub oo hanti ah waxayna kicin karaan kobaca dhaqaalaha.

Dalal afrika nooc walba oo kheyraad ah ayuu ku duugan balse weli meysan fahmin ilaha dhaqaale ay ku fadhiyaan,taasi waxay sababtay in maalin kasta ay ku tirsanadaan reer galbeedka.

Waddamo badan oo Afrikaan ah ayaa si weyn ugu tiirsan hal warshad ama waax kobocooda dhaqaale.

Kala-duwanaanshaha dhaqaaluhu waxay kaa caawin kartaa in la yareeyo khataraha oo ay abuurto xasilloon, korriin mustaqbalka fog ah.

Tan waxa lagu samayn karaa hindisayaal ay ka mid yihiin horumarinta warshado cusub, maalgashiga tignoolajiyada, iyo horumarinta hal-abuurka.

Dhaqangelinta xeeladahaas, wadamada Afrika waxay kordhin karaan hantidooda oo ay wanaajiyaan nolosha muwaadiniintooda.

Waxaa muhiim ah in dowladuhu ay si dhow ula shaqeeyaan ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah si loo hubiyo in hindisayaashani ay noqdaan kuwo guuleysta oo saameyn togan ku leh dhaqaalaha.

WQ: Cabdiraxiim Jimcaale

# ILAALINTA AWOODDA SHARCIGA SHACABKA LEH



Shacabka waa awooda koowaad ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, dowlad kastana waxa ay ku dhisan tahay shacabkeeda, sida dowladdeenuba ay Shacabka Soomaaliyeed ugu tiirsan tahay.

Shacabka waxuu awood u leeyahay in uu aqbali karo ama diidi karo waxa markaasi taagan, qaadan karana awaamirta Dowladda maamusho.

Shacabka Soomaaliyeed kuma baraarugsana umana nugla awooda uu heesto, sidaa darteed waxa ka lunsan awoodi uu lahaa.

Marki ay Dowladdu amar soo saarto waxaa la rabaa qofka Shacabka ahi in uusan sugin Cadaadis uga yimaado dowlada, uu garto doorka uu ka qaadan karo sharcigaas ama amarkaas ay Dowladda soo saarto.

Dowladda waxa ay xaq u leedahay in ay qanciso Shacabkeeda, sida ganacsaduhuba uu macaamiishiisu u qanciyo.

Haddii Dowladda doorkeeda laga waayo shacabku waxa uu xaq u yeelanayaa in uu soo gudbiyo cabashadiisa.

Shacabka Soomaaliyeed waxeey qeyb ka yihiin hormarrada kala duwan ee uu dalku sameenayo.

Waxaana lagama maarmaan ah in muwaadin kasta uu taageero dowladdiisa, dowlad kastana waxaa looga fadhiyaa daryeelka shacabkeeda.

Awoodda shacabka oo mideysan waa awoodda qaran xooggan, markay shacabka iyo dowladdu meel qura u wada socdaan ayey gaari karaan halka hiigsigu yahay, taageerada muwaadinka uu u hayo dowladdiisa ayaa waxay dhiirigelin u tahay dowladdiisa.

W/Q: Xuseen Xasan Rooble Shadoor

# DOOD ABUURISTA FADHI KU DIRIRKA MAXAY SOOMAALIDA KA HELAAN ?



Marka aad soo gasho gaadiidka daweynaha ..marka aad labo ilaa saddex qof ku noqotaan gaari gaar ah oo aad wadataan.. marka aad geed yar ku hoos nasaneysaan.. maarka aad maqaayad fadhisaan oo shaaheysaan ama qadeyneysaan…mar kasta waxaa jiraya qof bilaabaya dood fadhi ku dirir ah.

Doodaas mar walba waxay ku saleysan tahay hadal heynta siyaasadda ugu badan ee xilligaas waxayna dad badan galisaan xamaasad qaarkoodna waa isku xiiqaan.

Maxamed Axmed weli oo ah aqoonyahan wax badan u soo joogay ayaa ii sheegay in xilligii sagaashameyadii ay ahaayeen xilligii fadhi ku dirirku u shaqeyn jiray sida baarlamaanka oo qofba kan uu kaga wanaagsan yahay doodad fadhi ku dirirka lagu tixgalin jiray.

“Kuraasta goobaha fadhi ku dirirka waa la kala lahaan jiray ..waxaana jiray dad la sugu jiray inta ay giibta imaanayaan oo xogaha iyo falanqeynta caan ku ahaa” ayuu yiri.

Inta badan dadka soo bandhiga doodaha fadhi ku dirirka waxay ku dhegan yihiin oo taageero indho la’aan ah u hayaan dad ay qaraabo ahaan ama qabiil ahaan siyaasadda ugu garbeynayaan waxayna dadka kale ka gadaan fekerkooda.. mararka qaarna meel qaraar ayey la gaartaaa oo waxay dadka kale ku sandulleeyaan in fikirka ay gadayaan la qaato.

Doodahan waxay aad u badan yihiin xilliyada siyaasaddu kacsan tahay.. khilaafyo ay jiraan ama xubno cusub xil ay helaan ama ay raadinayaan.

Sidoo kale marka xiisadaha qabaai’ilka ay jiraan lama waayo fadhi ku diriro heyb heyb isu heysta oo mararka isku daya in ay dadka kale marag gashadaan oo doodooda u soo bandhigaan.

Doodaha fadhi ku dirirku marna ma dhammaadaan waxaana lagu kala tagaa iyagoo weli su’aalo badan aan laga jawaabin waayo intooda badan waxay ku dhisan yihiin lab la kac.

“Fadhi ku dirirka waa waxa maanta meeshaan na dhigay.. waayo qarankii oo dhan ayaa lagu burburiyey..mana jirto faa’ido laga helayo oo aan aheyn waqti lumis iyo dood ma dhasho ah” ayuu yiri Mursal Cismaan Maxamed oo sheegay in aanu jecleyn in uu goob joog u niqdo goobaha fadhi ku dirirka uuna inta badan uga maagay oo isaga dhaafay tagista goobaha la isugu yimaado.

Dadka qaar waxay u heystaan in ka hadalka goobaha fadhi ku diriirka uu qofka ka dhigayo mid ku fiican gole-ka –hadalka ugu danbeyntana uu ku soo bixi karo siyaasi odoros wanaagsan leh laakain inta badan arrintu way ka duwan tahay sidaas oo dadka qaar waxay dhex geysaa badaha qabyaaladda.

WQ: Maxamed Xasan Shiil

# HADDA JOOJI OO HA CABIN WIXII NAFTAADA QATAR GELIN KARA SIDA SUNTA



Waxaa guud ahaan Dunida ku soo badanaayo cabista sunta oo ay cabayaan dhallinyaro kala duwan kuwaa oo loo sababeenaayo ama loo aaneynayo in ay u cabayaan jaceel dartiisa, balse lama oga xaqiiqda dhabta ah ay ka danbeesa in sunta lacabo.

Sidoo kale waxay ka dhaceen arrimahan sun cabista dalkeenna.

Dhacdooyinkaan ayaa ka kala dhacay degaanno ka tirsan maamulka galmudug sida Gurceel , dhuusamareeb iyo deeganno kale iyo sidoo kalena waxa ay ka dhaceen maamulka Jubbaland gaar ahaan degmada baardheere ee gobolka gedo iyo Gobolka banaadir gaar ahaan buundooyinka.

falalkan ay sameenayaan dhallinyarada ayaa marba marka ka siiidanbeyso soo badanaayo ayaga oo la wareejinaayo baraha bulshada gaar ahaan facebook-yada iyo tik tok iyo aaladdaha kale ee bulshada isticmaasho.

dhallinyarada qaar ayaa sunta u caba in ay caannimo ka helaan oo ay soo caan baxaan balse ma oga in ay nafsaddooda ay halis weyn oo mustaqbalkooda saameen ku yeelan doonta.

noocayada ugu badan ee sunta ay dhalin yarada ay cabaan ayaa waxaa kamid ah sida sunta dooliga , sunta waraabaha , sunta dilqaha iyo noocyada kale sumaha xoolaha loo adeegsado .

dhacdooyinkaan sunta lacabo ayaa midba midka kale ka daran tahay, dhacdo xanuun badan ayaa waxa ay ka dhacday maamulka hirshabeelle gaar ahaan gobolka hiiraan Balad weyne haweeney ayaa macallin dugsi quraan oo qabay sun ugu dartay baasto casho aheed waxayna sababtay in uu macallinka sunta u dhinto.

Sidoo kale waxaa jiro dhacdo kale oo ka dhecday degmada baardheere ee gobolka gedo wiil dhallinyaro ah ayaa sun ku cabay magaalada baardheere waxaana uu u cabay jaceel dartiisa gabar uu qabo.

Haddaba xaggey ka soo min guuriyeen falalkan oo aan horay looga aqoon guud ahaan dalka Soomaliya, sidoo kale Diinteenna maxay ka qabtaa sun cabistaas iyo in qofka uu nafsaddiisa halis bareer ah uu galiya ama uu is dilo?.

Dhaqamadan sidaa u foosha xun waxay ka soo min guuriyeen sida badan Aflaanta beenta ah ee Hindida sida Boolly woodka iyo Holly woodka oo lagu faafinaayo dhaqamada reer galbeedka, iyaga oo dadka waxa xun tusinayo ayaa wax wanaagsan uga dhigaan.

Sidoo kale, waxaa ku jira filimada ficillo aad run mooddo, balsa aanan run aheyn oo atooraha filimka jilaayo uu sameynayo wax run u eg balse aan aheyn sida dabaq dheer gabadh uu jecel yahay darteed isaga soo tuura, sun u caba , ama darteed isku dila balse intaas aysan waxbo ka jirin oo masalaad uun tahay,

Dhallinyaradeena Soomaaliyeed waxa ay u qaateen atoorayaasha filimada jilaayo in waxa ay jilayaan ay run tahay taasina ayaa sababeesa in dhallinayaradii oo iskugu jira wiilal iyo gabdho ay sameeyaan, balse naf saddooda ay qatar weyn oo saameen ku yeelaneeyso galinyaan mararka qaarkoodna waxaa dhacada in ay u dhintaan sunta ay cabayaan amaba ay xaalad halis oo koomo u galaan.

Haddaba Diinta waxa ay ka soo horjeedaa in qofka muslimka qaaliska ah in uu nafsaddiisa qatar galiyo, sidoo kalena diinta waxa ay inoo sheegeysaa qofka uu isdili karin, uu is ceejin karin, uu isu sumeyn karin intaasba uu ka fogaado qofka muslimka ah.

Nabi Maxamed (NNKH) ayaa inoo sheegay in qofkii nafsaddiisa gooyo in uu Alle aaqiro xisaab culus isaga iyo Ilaahiisa dhaxmari doonto.

Waxaa sidoo kale Nabi Muxamed inoo sheegay in qofkii ay la soo daristo kurbo , wal wal, cabsi in uu qofkaas uu weyseysto uuna aado masaajidka si uu laba rakco oo sunno ah usoo tukado ka bacdina uu Alle baryo uuna waydiitso in uu kurbada ama wal-walka haayo uu ka dul qaado.


Nabigeenna waa ka digay in qofka muslimka ah uu nafsaddiisa halis galiyo ama isdilo waxaana uu inoo sheegay nabigeenna Muxammad (NNKH) in qofkaas aaqiro ay hortaalo xisaab adag .

Diinteenna suuban waxa ay nafareesaa waxa wanaagsan in aan ku camal falno waxa xun aan ka tagno.

Sidoo kale, diinta ayaa inoo sheegtay qofkii dareema murugo ama wal-wal in uu Alle baryo uuna weydiiso si uu uga qaado murugada.

Diinteenna Islaamka waa nasteexo qofka muslimka ahna waxa ay ka dhigtay qof xor ah oo sharfan, ku dhaqma diinta dadkana gaarsiya isaga oo u sheegaya in uu dadka faro wax wanaagsan, xumaantana ka fogaadaan .

WQ: Abdinaasir Yuusuf Aadan



# ISLAAMKA IYO NOLOSHA

## ISLAAMKU WAA DIINTA KALIYA EE SAXDA AH



Islaamku waa diin isu miisaanta nolosha adduunka iyo nolosha Aakhirada, waayo adduunku waa Daar loogu tala galay ruuxa Muslimka ahi inuu ku tabcado acmaashii u horseedi lahaa himilooyinkiisi aakhiro, adduunkan waa maalmo kooban oo loogu tala galay in qofka kaga faa'ideysto intuu noolyahay kasbashada waxyaabaha gaarsiinaya janno iyo raali ahaanshaha Alle.

Adduunku ma ahan meel lagu nagaado, ma ahan meel lagu waarayo, waa meel safar laga yahay, waa wado la maro looguna tala galay in aan beerta aakhiro ee aan dhammaadka laheyn ku tabcano. Ruuxa Muslimka ahi lama rabo in hamigiisa uu noqdo adduunyo oo kaliya, bal waxaa laga rabaa in hammigeena ugu weyn uu noqdo aakhiro iyo sidii ugu diyaar garoobi laheyn Nimcooyinka aan dhammaadka laheyn ee aakhiro, kuwaasoo aan lagu gaareynin cayaar cayaar iyo in adduunka lagu raaxeysto.

Badeecadda Allah SWT waa qaali, badeecada Ilaahay subxaanahu wa tacaalaa waa Janno, laguma helo dheel dheel ee waxay rabtaa shaqo iyo soo jeed badan, soon, salaad, sadaqo iyo adigoo shartaada laga nabad galo, samir iyo dhibaatooyinka ku soo gaarayo oo aad ku samirto.

Qofka Muslimka ah, waxaa laga rabaa in mar walbo xusuusnaado Aakhiradiisa, waayo aakhirada waa waxa qofka ugu dhow, mana garan kartid goorta adduunkan ka tageysid iyo qaabka uga tageysid sidaa daraadeed, waxaa waajib nagu ah in daqiiqad walbo Alle subxaanahu watacaalaa xusuusnaano, Alle aan u noqono si aan u helno dambi dhaaf una gurano xasanaad iyo khayraadka sabab u noqon kara in Allah swt Jannooyinkiisa nagu arzaaqo.

Jannada Alle ma ahana wax la gooyn karo, ma jirto cid janno ku geli karto wax ay shaqeysatay oo isuma dhigmaan mana isu dhawa shaqo maalmo aad sameysay inaad janno kuu goynayso, jannada waa deeq Rabbi ugu deeqo addoomadiisa baariyaasha ah kuwaasoo qaatay amarkiisa in allaale intay karaan.

Sidaa daraadeed, waxaa nala gudboon inaan dadaalno intii karaamkeena ah si Allah subxaanahu watacaalaa noogu naxriisto oo dambigeena u dhaafo jannooyinkiisana hooy noogaga dhigo.

Ruuxa Muslimka ahi waxaa laga rabaa inuu ku toosnaado dhammaan dhinacyada nolosha si uu u gurto abaalka arrinkaas adduunka iyo Aakhiradaba. Beerta iyo abuurkanina wuxuu u baahan yahay inaad ku qaabisho nolosha nafsad kheyrka rajeysa uu ka buuxo dadaal iyo go'aan adeyg, arrinkaasina wuxuu ka muuqdaa waxyaalahan soo socdo:

Allaah subxaanahu watacaalaa Wuxuu yiri: "Wuxuu idinka abuuray dhulka oo idin dejiyey dhexdiisa si aad u camirtaan" (Huud: 61)

Allaah wuxuu nagu beeray arladan oo na amray inaan camirno oo ku hormarinno ilbaxnimo iyo dhismo u adeegeysa aadmiga, oo aan ka hor imaaneyn shareecada Islaamka ee sahlan, balse wuxuu ka yeelay camiraaddeeda iyo hormarinteeda waxyaalaha ay dooneyso shareecada iyo cibaadooyinka xitaa waqtiyada lagu jiro duruufta adag iyo marka uu xaalka murugsan yahay, sidaas awgeed buu Nabigeenna scw ku baraarujiyey qofka Muslimka ah in haddii qiyaamuhu dhaco isagoo gacanta ku haya abuur uu doonayo inuu beero, markaa waxaa saaran inuu ku dhaqsado beeritaankeeda, hadduu karo si ay ugu noqoto sadaqo.

Islaamka wuxuu ku baaqaa in lagala qayb qaato dadka xagga dhismaha iyo sameynta ilbaxnimo iyo wax hagaajinta, iy in la dhex galo dadka oo lala xiriiro si edeb iyo dabci san leh si kastaba ha u kala duwanaatee dhaqammadooda iyo diimahooda, wuxuuna Islaamka nagu baraarujiyey in ka dhex bixidda iyo ka fogaanshaha dadka aanay ahayn dowga dadka diinta ugu yeera iyo kuwa wax hagaajiya, sidaas awgeed buu Rasuulka scw Ilaahay swt ka yeelay in qofka dadka dhex gala oo ku sabra waxa ka soo gaara oo dhibaato iyo gef ah uu ka fiican yahay qofka ka gooni noqda oo ka fogaada (w.w. Ibnu Maajah 4032)

Islaamku ma yaqaan dagaal ka dhexeeya diinta iyo cilmiga sida diimaha kale, bal si ka duwan taasi si dhan, diinta waa baaqa cilmiga waana taageeraha iyo ugu yeeraha dadka barid iyo barashoba maadaama uu ugu jiro khayr aadimiga

Sidaas awgeed buu Allaah u maamuusay qaddarka caalimka ee bara dadka khayrka oo u yeelay darajooyin sare, wuxuuna Nabigeenna scw sheegay in dhammaan uunanka ay u duceeyaan macallinka bara dadka khayrka. (At-Tirmidi 2685)

WD: Ibraahim Warsame Xuseen

## MAAN DOORIYAHA SOOMAALIYA KU SOO BADANAYA IYADA OO DIINTA ISLAAMKU XAARAANTI-NIMAYSAY

Soomaaliya sanadihii dame waxaa aad ugu soo badanayay waxyaabaha maanka dooriya, waxayna saamayn xun ku yeelatay bulshada qaybaheeda kala duwan sida dadka isticmaala oo batay iyo dadka aan maan dooriyaha isticmaalin oo kuwa isticmaala dhibaato kala kulma.

Maan dooriye waa uu qaabab badan yahay waxaa uuna leeyahay magacyo kala duwan oo qurqurxan, hase ahaatee tilmaamta kaliya ee lagu fahmi karo ayaa ah tilmaamaha ay ku timaamtay diinteena, maan dooriyaha oo ah wax kasta oo maanka bini'aadamka badala inuu yahay maan dooriye ama Qamro.



Bulshada soomaalidu ma ahayn bulsho ay ku badan tahay maan dooriyuhu haba jiraan qaybo maan dooriyaha kamida oo ay istimaali jireen ragga waa wayn oo kaliya sida Jaadka/Khaadka iyo Toobaakada kuwaasna dhalin yarada iyo dumarku ma isticmaali jirin.

Maan dooriye loo soo bixiyay magacyo kala duwan ayaa hada wadankeena lakeena sida Taabuuga, Tufaax/Shiishad, Qamro magacyo qurxoon loo soo bixiyay iyo kuwo kale oo badan kuwaas oo dhalin yaradii gabdho iyo wiilalba badan kood ay isticmaalaan waana arin diinteena Islaamka lid ku ah.

Goobaha waxbarashada sida Iskuulada iyo Koleejyada waxaad ku arkee warqadaha lagu keeno Taabuuga halkaasi oo aad ka fahmayso in qaar kamida ardaydu ay isticmaalaan maan dooriyaha, waxaana cad qofkii maan dooriye isticmaalaa uu san la socon Karin casharka ileen maankiisu ma joogo oo waa doorsamee.

Ardadaas isticmaalysa maan dooriyaha waalid ayaa u soodirsaday inay waxbartaan oo lacag ku bixiya inay meel wanaagsan gaaraan, hadaba ogow dhalinyaro inay danbi wayn tahay maan dooriyuhu sidoo kalena inaad waalidkaa dhibaato iyo qasaaro galisaa ay tahay danbi kale oo aad u wayn.

Baryihii dambe wadooyinka magaalada Muqdisho waxaa lagu arkayay dhalooyin qamro kuwaas oo faaruq ah aadna ka fahmaysid in habeenkii la isticmaalo, dhalooyinkaa qamriga ah si sharci darro ah ayaa dad ganacsato ah ku soo galiyaan dalka iyaga oo ka soo galiya xuduudka aan la leenahay wadamada dariska ah sida Itoobiya iyo Kenya.

Lacagta laga faa'iido ka ganacsiga waxyaabaha maanka dooriya sida Qamriga waa xaraan sidoo kalena waa xaraan in maan dooriye ahaan loo isticmaalo, diinteena Islaamku waxa ay u xaaraantinimaysay maan dooriyaha xikmado badan ayaa ku jirta kuwaasi oo ay bini aadamku qaar fahmi karaan iyo kuwo kale oo badan aysan fahmi Karin.

Xikmadaha lafahmi karo ee diinta Islaamku u xarintay maan dooriyaha waxaa kamida, haday bulshadu isticmaasho maan dooriye waxaa badanaya danbiyada dadka dhexdooda kala galaan sida dhaca, dilka, kufsiga iyo kuwo kale oo badan sida qofku inuu san cibaaday san Karin maadama uusan garanayn hadalka ka soo baxaya qofka maankiisu doorsan yahay sidaasi darteedna ugu horayn looga xarimay qamriga xilga salaada ka hor waqtigii Nabiga nabad galiyo iyo naxariis dushiisa ha ahaatee.

Hadaba, aan u hoggaan sanno awaamiirta diinteena Islaamka anaga oo gacmaha is haysana aan joojino maan dooriyaha kuwa ka ganacsada iyo kuwa isticmaalaba Alle ha kabaqaan oo ha iska dhaafaan xumaanta

Dalka Edatorial

## ISLAAMKA IYO UJEEDADA QISAASTA IYO XAD OOFINTA (QEYBTA 2-AAD)

Dhanka Xuduuda ka ratibmaysa xoolo la dhacay wuxuu Alle ka yiri:-

"Ninkii iyo naagtii tuugada ahaa gacmahooda jara si looga gooyo dambigii ay galeen iyadoo ay taasina tahay Ciqaab xagga Rabi oga timid Ilaahayna waa mid tiisa uun ay socoto oo fal suuban".

Fulinta Xadka gacan goynta waxaa ku xeeran shuruudo badan oo adag oo ay ugu horeyso in horta waxa laxaday gaaraan laba garaam oo Dahab ah qiimo u dhigma ama ka badan, lagana xaday goob lagu xafiday, xooluhuna uusan qofku waxba ku lahayn, inuu qofku yahay qaangaar aan Maskaxda ka jiraneyn, inaysan qofku haysanin xaalad adag oo gaajo geeri sababi karta ah iwm.

Dhanka xuduuda ka ratibmayso gogol dhaafka iyo galmada aan sharciga ku fadhiyin wuxuu Alle ka yiri:-

"Naagta iyo ninka sineysta mid kasta ku dhufta boqol jeedal, oo yeysan idiin qabanin inaad oga turaysaan diinka Alle haddii aad tihiin kuwo Alle iyo Maalinka Qiyaame rumeysan, oo waliba ha xaadireen goobta lagu ciqaabo qeyb mu'miniinta ka mid ahi".

Sinada iyo galmada aan sharciga waafaqsaneyn waa dambi weyn oo laga galayo sharafta qofka iyo mujtamaca iyo waliba taranka, maadaama ay kulansatay waxyeelooyin Caqligu garan karo oo aan la soo koobi karin, markay ugu yar tahayna waa cadaalad daro iyo khayaano laga galay qofka guursanaya qof galmo sharci daro ah hore ula wadaagay qof kale.

Dambiyada Xadka waajibinaya oo aan ahayn labadan aan tusaalaha u soo qaatay oo kaliya maaha kuwo la ogol yahay in lagu fududaado oo waxaa mid kasta la dul dhigay shuruudo adag oo naadir ka dhigaya fulinteeda, waxayna diinta islaamku amartay in shubhada ugu yar lagu buriyo fulinta xudduuda.

Rasuulka scw wuxuu yiri:

"Celiya xuduuda oo ha ku fududaanina fulinteeda inta aad u helaysaan wax aad ku celisaan.

"Ka celiya Muslimiinta fulinta Xuduudda intaad awoodaan, hadii qofka lagu fulinayo yeesho wax uun marmarsiinyo ah iska daaya, waayo in Imaamku cafin ku gafo ayaa u dhaanta intii uu ciqaab ku gafi lahaa".

Waxaa kale oo Asxaabtii Nabi Muxamad scw ka sugnaatay inayba mararka qaar joojin jireen fulinta Xuduuda.

WQ: Ibraahim Warsame

WARGEYSKA DALKA
WARGEYSKA DALKA: waa wargeys ay soo saarto Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Dalxiiska Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# ARRIMAHA BULSHADA

## DOORKA AQOONTA IYO WAXBARASHADU U LEEDAHAY HORUMARKA DALKA (QEYBTA 1AAD)



Ugu horayn waa maxay waxbarasho? Ereyga Waxbarasho wuxuu ka kooban yahay 10 xaraf Wax-waa waxkasta oo lagu tilmaami karo inuu yahay shey, Barasho-waa raacid (Daraasayn) waa wax qof uu ku gaaro go'aan inuu ku bixiyo waqti iyo hanti. Waxbarashada soomaaliya waxay soo martay heerar (Marxalado) kala duwan taaso ah;

1. Qofka waxbarta lala yaabo oo la yiraaho wuuxuu doonaya gaalnimo!

2. Waqtigii loo mari jirey masaafo (socod dheer) si loo helo qof leh in yaroo cilmiya!

3. Xilli ay wax baran jireen dadka ladan( lacagta haysta, dowlada ushaqeeya)

4. Waqti dadka marka la siiyo waxbarasho lacag la'aana (Scholar ship) ay yiraahdaan dadkayaga yaan nalaga gaalaysiin! Weliba waxay ka dhacday Gobolo ka mida Soomaaliya oo iminka markaad eegtid ay kaaga bidhaamayso halka ay aqoon la'aantu ka marayso.

Su'aalo muhima inuu iswaydiiyo qofka waxbaranaya;

1. Maxaan wax ubaranayaa?

2. Maxay faa'iido iileedahay waxbarashadu?

3. Maxaan dadka Jaahilka ah kaga duwannahy? 4. Maxaa la ii gu bixinaya kharashka iyo Dadaalka intan le'eg?

Waxaan u hubaa sidaan geeridayda u hubo in qofka su'aalahan iiga jawaaba sida saxda ah inuu ka aflaxayo (gungaarayo) waxbarashadiisa iyo mustaqbalkiisa kusoo fooleh.

Horumarku wuxuu ku xiran yahy waxbarashada! Waxa la yiraahdo horumarka micnihiisu waa shaqo aan dhammaanayn oo weligeed soconaysa haddii la yiraahdo horumarkii waan dhameyney ee aan ka nasano waxaad ku noqonaysaan halkii aad markii hore kasoo ambaqaadeen.

Horumarku waa dad ku heshiiyey inay socodsiiyaan (hore u wadaan) waxyaalahan hoos ku taxan;

1. Xiriirka ka dhexeeya iyaga iyo deegaankooda ( Ecology)

2. Dhaqankooda (Culture)

3. Dhaqaalaha dalka (Economy) iyo

4. Siyasadda (Political).

Waxyaalahan aan kor ku soo xusay intuba waa waxyaalo la barto oo ka mida waxbarashada laguna dhigto macaahidda iyo jaamicadaha, dhammaan Afartan waxyaalood waxaa tiir dhexaad u ah oo aanay kamaarmayn waxbarashada, waxabarashada la'aanteed lama socodsiin karo lamana horumarinkaro.

Noocyada Hantida

1. Hanti kula taal.

2. Hanti kuu taal.

3. Hantida kugu taal.

Waa maxay hantida kula taal? Hantida kula taali waa tan aad haysatid amba lacag amba guryo waa mid kula taal.

Hantida kula taal waad waayi kartaaa! Haddii uu dhaco dagaaal halka ay taal ayaad kaga carari tusaale nool Imisa qof oo ahaa dad lacag leh (Millionaire) ayaa markii laga qaxay Magaalooyinka Soomaaliya guud ahaan gaar ahaan Xamar noqday kuwo aan waxba haysan aaway hantidii ay ku naawili jireen!.

Hantida kuu taal waa wixii aad ILAAHAY dartii ubixisay ee kuu yaala Baanka Aakhiro Mana aha wax kaa halaabaya ama aad waayeysid.

Hantidan waa Waxbarashada qofka way u taal Waxa la sheega in hantidan qofka haystaa uusan weligii waayeynin inta noloshiisa ka dhiman uuna meel kasta la tegi karo waana hantida ugu muhiimsan ee qofku yeesho markan ka hadlayno Adduunka!. Waxaan kugula talin lahaa Akhristow bal inaad dhuuxdid xigmadaas aan hore uga soo dhawaajiyey waxaana hubaa in qofka waxbartaa uusan weligiis ku qadayn cilmiga uu leeyahy ha u qaadan tacliinta in qofku Qalin iyo Buug qaato maaha waxaa jira wax la yiraaho Xirfad ( Skills) qudheedu waxay ka mid tahy waxbarashada.

WD: **Ibraahim Warsame Xuseen**

## FAA'IIDOOYINKA LAGA DHAXLO QUBAYSIGA BIYO DIIRAN MAALIN KASTA



Waxaa jira faa'idooyin badan oo laga helo qubeysiga biyaha Diiran waxaan ka mid ah:-

1- Hagaajinta wareegga dhiigga:

Biyaha Diiran waxay ay qayb weyn ka qaadan karaan daaweynta xanuunada muruqyada iyo kalagoysyada kudhaca sidoo kale waxa u fiican yihiin lafa xanuunka ,Biyaha Diiran ayaa qayb weyn ka qaata wareegga iyo iskusocodka dhiigga jirka.

2. Nadiifinta Maqaarka:

Nadiifinta Daloolada maqaarka jirka kuwaas mar marka qar ay suurtagal tahay in ay ku dhacaan jeerrmiska dhibateeya jirka , Biyaha Diiran waxay ay caawiyaan in ay furaan daloolada maqaarkaaga, iyagoo ka dhigaya kuwo si fudud loo nadiifin karo lagana takhalusi karo jeermiska.

3. Yaraynta daalka iyo caajiska:

Qubeys Biyah Diiran ayaa dajiya maskaxda iyo neerfaha, kaan caawiya soo celinta Firfircoonida jirka .

4. Yaraynta durayga:

Uumiga biyaha Diiran ayaa yarayn kara xaakada waxayna kaa caawin kartaa nadiifinta xabka oo sababi kara qufac ama cuna xanuun, sidoo kale kaa caawin kara xanuunada kale ee la xiriira qabow.

5. Firfircooni dheeraad ah:

Qubeysiga biyaha diiran waxaa laga helayaa firfircooni dheeraad, waxaa kaloo qubeyskaas oo faa'ido u leeyahay wadnaha, waxaa uu daawo u yahay dhiikarka iyo cun cunka.

Qubaysiga Biyo Diiran ayaa leh faiidooyin badan gaar ahaan hadi aad intaadan shaqada aadin subaxa hore ku qubaysatid, waxay kaa caawin kartaa qulqulka dhiigga iyo diirimaadka murqayada, oo labaduba muhiim u ah jimicsiga jirka.

Daraasado ayaa muujiyay in qubeyska biyaha diiran ay kordhiso heerarka looyaqaano Oxytocin (hormoonka jacaylka) waxayna yareeysaa walaaca .

Waxayn u fiican yihiin dadka inta badan ka cabanaya daalka iyo jaaciska waliba marak ay ka soo baxaan shaqooyinka ayna rabaa in ay nastaan ama ay seexdaan.

Ugo dambaytiin qubayska Biya Diiran ayaa ka caawinka in aad hashid raaxo iyo nasasho.

dhanka kale joogteenta jooska oo lagu sheegay in ay jirka uleeyahay faaiidooyin caafimaad iyo firfircooni

jooska ayaa wuxuu kamid yahay miraha aadka looga isticmaalo meelobadan oo kamida dunida ayadoona siyaabo kaladuwan looga faaiideysto.

jooska ayaa lagu tilmaamay in jirkeena uu u leehay faaiidooyin badan oo caafimaad marka si joogta ah loo isticmaalo .

dhakaatiir ku takhasustay nafaqada ayaa waxey shegayaan in jooska ay kujirto fatamiino iyo macaadin jirka waxtar u leh kana qeybqaadanaya diifaaciisa.

waxaana kamida waxyaabaha sidagaarka ah loogahelayo:-

1- wuxuu daawo uyahay wadno xanuunka.

2- wuxuu ka qeybqaataa yareenta xanuunada kudhaco mindhicirka.

3- waxaa sidooklae lagu dabiibaa cudurka kansarka iyo baabasiirka.

4- waxaa sidookale uu kaqeyb qaadanayaa hoos udhiga miisaanka iyo kahortaga lafa burburka.

Qore: Axmed Gesood

## QASHINKA IYO BACAHA LAGU TUURO BADAHA



Wasaqeynta badaha waa qatar guud oo dunida ay wajaheyso taas oo leh saameyn xoog leh oo deegaanka ah.

Bacaha ayaa ka mid ah dhibaatada ugu xooga badan ee saameynta leh taas oo wadamo badani aanay ku baraarugsaneyn.

Qashinka bacaha ee badaha aduunka waxaa lagu qiyaasaa sanadkii inta u dhaxeysa 4-12 malyuun oo tan.

Qaarada afrika oo dalkeena uu leeyahay xeebta labaad ee ugu dheer waa tan labaad ee ugu qashinka badan marka laga hadlayo badaha.

Xeel dheerayaasha deegaanku waxay sheegeen in 10 wabi oo ku yaala qaaradaha Afrika iyo Asia ay qashanka bacaha ay qaadaan uu 90% ku darmo badaha taas oo ah dhibaato halis badan .

Qaramada midoobe waxay bishii December ee sandkii 2017 Nairobi ku qabatay shir looga hadlayay dhibaatada qashinka bacaha uu badaha u leeyahay.

Shirka waxaa muhiimadiisu ay ahayd sidii ganacsatada iyo dowladaha ugu baraarugi la haayeen halista dahsoon ee qashinka badaha.

Dalkeena soomaaliya waxaa aad ugu badan isticmaalka bacaha kaas oo leh saameyn deegaan bad iyo bariba.

Qashinka bacaha soomaaliya waxa uu daadsan yahay meel walba mana jiro hanaan qashinka ay dadku isaga fogeeyaan .

Magaalada Muqdisho oo kaliya waxaa la qiyaasaa in maalinkii qashinka ka yimaada uu gaarayo 2.500 oo tan

Qashinkan oo bacaha ay qeyb weyn ka yihiin waxa uu badankiisa ku danbeeyaa badda.

Meelaha qaar xeebta Muqdisho waxaa qashinka bacaha uu yahay mid Aad u muuqda

Inkastoo hada uu muuqdo dadaal iyo baraarug dhanka qashinka bacaha ah hadana wali ma ahan sidii la rabay.

Wadamo badan oo ku yaala qaarada afrika ayaa leh siyaasad xoogan oo ku Aadan la dagaalanka qashinka bacaha.

Dalalka ka miro dhaliyay waxaa ka mid ah dalka Rwanda

Heyada IMO ee ka shaqeysa arimaha maamulka badaha aduunka ayaa ku talisay in wadmada horumaray joojiyaan wasaqeynta badaha iyo in la yareeyo bacaha.

Dalka Edatorial

# DHAQAALAHA & GANACSIGA

## CANSHUUR BIXINTU WAXAY QEYB KA QAADATAA BILIC SOO CELINTA CAASIMADDA



Ganacsatada waa inay hormuud ka ahaadaan bixinta canshuurta waayo Dal kasta koboca dhaqaalihiisa wuxuu ku xiran yahay hadba sida dadkiisu isaga xilsaaraan bixinta canshuuraha.

Canshuurta oo la bixin waayo waxay keentaa in ay yaraadaan adeegyadii dowladdu dadka u fulin jirtay iyo dhismaha dhaqaale sall fiican leh.

Meelaha ugu muhiimsan ee ay canshuuruhu ka yimaadaan waxaa ku jira canshuuraha laga qaado waxyaabaha dalka soo galaya, kuwa ka baxaya, canshuuraha berriga tan guryaha iyo ganacsiyada kala duwan.

Sidoo kale canshuuraha waxaa lagu dhisaa kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, buundooyinka , korontada , dekedaha , garoomada, isbitaalada, dugsiyada , jaamacadaha iyo adeegyada kale ee dadku u baahan yahay .

Dalka soomaaliya tan iyo burburkii dalka ka dhacay ma jirin adeeg canshuur bixin dad badana waxay u qaateen in laga maarmay ama aan looga baahneyn in ay bixiyaan canshuuraha taas oo ah arrin si qalad ah loo rumeystay.

Dalna laguma dhisi karo taageero dalal kale haddii aanu helin wax uu isagu leeyahay oo uu u madax bannaan yahay, taas waxay ku imaan kartaa in qof waba garto waajibaad ka saaran dhismaha dalkiisa taas oo ku imaan karta in qof walba xaqiiqsado waajibka saaran oo ah bixinta canshuuraha uu qaranku ku leeyahay.

Canshuur la'aan waa horumar la'aan iyo in aan laga fekereynin aayahay dalka iyo dib u dhiskiisa waayo waxaa xaqiiq ah in haddii la diido ama laga meermeero bixinta canshuuraha ay dhif tahay gaarista yoolka horumarka la tiigsanayo.

Muwaadin kasta waxaa ku waajibeysa canshuurta marka uu ka feekerayo in loo adeego oo uu helo waddo uu maro, isbitaal lagu daweeyo iyo dugsi carruurtiisu wax ku bartaan.

Caaalamka qofka canshuurta diida ama la dhuunta waxaa saarmay lacag ka badan canshuurtii laga rabay eek u waajibtay waxayna keentaa in qofku ka welwelo haddii uu bixin waayo canshuurta ganaaxa dulsaarmi doona canshuurtii laga rabay.

Waxaa hey'adaha dowladda waajib ku ah in ay labalaabaan wacyigalinta dadka ee ah sidii ay canshuurta u bixin lahaayeen si dalku u helo horumar.

Waxaa jura dadaalo dhowr ah oo ay wadaan wasaaradda maaliyadda iyo gobolka Banaadir oo ku saabsan wacyigalinta canshuur bixinta waxayna taa lafteedu u baahan tahay in la sii xoojiyo si ay dadka uga dhaadhacdo faa'idada canshuur bixinta.

WQ: Cabdicasiis Maxamed

## DHOOFINTA XOOLAHA OO FAA'IIDO U LEH SHACABKA SOOMAALIYEED



Dunida aan ku nool nahay waxaa Ka buuxo nicmooyin fara badan uu Alle SWT ku maneeystay nicmooyinkaas faraha badan dalalka qaar kama sino nicmooyinka sababtoo qaar dalalkaas Alle waxa uu hodan oga dhigay kheeraadka ku duuggan dhulka hoostiisa oo maanta laga dareemayaa isbadalka dhaqaale adduunka oo sabab u ah soo saarida kheeraadkooda.

sidoo kale Alle dalalka caalamka nicmooyin kala duwan ayuu Alle siiyey oo aan maanta Ka dheehan karno koonka korkiisa nicmooyinka kala duwan.

dhanka kale, Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka uu Alle SWT ku maneeystay nicmooyin fara badan oo ay ugu horeeyso Dhaqashada xoolaha nool oo ay dhaqdaan shacabka Soomaaliyeed ku nool dal iyo dibadba.

Bulshada Soomaaliyeed waa bulsho firfircoon dhankasta marka laga eego ha ahaato dhanka waxsoosaarka, dhanka Tacbashada beeraha, dhanka soo jalaabashada kalluunka, ganacsiyada oo ay hormaro Ka sameeyaan ayaga oo ganacsigooda Ka gudbay xuduudka soomaaliya gaaray wadamo badan oo daris aan nahnay iyo kuwa caalamka ku yaala,

Dhanka dhaqashada xoolaha nool ee nicmooleyda ah oo ay aad u dhaqdaan.

Dhaqashada xoolaha nool dadka Soomaaliyeed waxa ay Ka dhigtay jira oo wali nool sababtoo ah burburkii markii uu inagu dhacay waxaan galnay xaalad quus ah oo aad daran balse xaaladaas murugada leh waxaan oga baxnay in aan u iibgeeno Xoolaha nool wadamo badan oo ay ugu horeeyaan sucuudiga iyo khaliijka oo inaga iibsan jiray.

Waxaaba marba marka Ka sii danbeyso sii badanaayey dhoofinta xoolaha nool oo ay shacabka Soomaaliyeed ay ka helaan dhaqaalo badan oo noloshooda wax weyn Ka badaleyso.

waxey shacabka ku sii dhiiradeen in ay sii badiyaan dhaqashada xoolaha nool oo faa'iido weyn inoo leh marka laga eego dhan kasta sida in qofka dhaqaalo ahaan uu isbadalaayo, in shacabkii sii dar dar galiyaan badin xoolaha nool sababtoo ah faa'iido weyn ayaa ku jirta, dowladdii oo iyana cashuur Ka heleyso kala socodka suuqayada caalamka.

Hadaba faa'iido noocee ah ayaa inoogu jirto dhoofinta xoolaha nool ee dalkeena laga dhoofiyo.

Faa'iido badan ayaa inoogu jirto dhoofinta xoolaha nool ee dalkeena waxaana ku soo koobayaa labo qodob oo kaliya ah.

1. Dhoofinta xoolaha nool waxa ay faa'iido weyn ugu jirtaa shacabka Soomaaliyeed sababtoo ah shacabka Soomaaliyeed waa shacab ku firfircoon dhankasta marka laga eego dhanka ganacsiga waxaana ay taasi keentay in shacabkii ay helaan fursado ganacsi oo ah dhoofinta xoolaha nool taasina waxa ay keentay in shacabku uu dhaqaalo ahaan, aqoon ahaan, waayo arignimo ahaan ay Ka faaideen Ganacsiyada kala duwan ay sameeyaan waxaana ay dhaqaale xooggan Ka sameeyeen dhoofinta xoolaha nool.

Sidoo kale waxa ay shacabka Soomaaliyeed ay Ka helayaan faa'iido weyn oo ah dhanka shaqo abuurka ah oo ay shaqo Ka helayaan dad badan shaqo u baaahnaa taasina waxa ay keeneysaa in dadka qaar ay badiyaan xanaaneenta xoolaha ismarkaana ay suuqa keenaan sidoo kale waxaa fursad helaya dad kale oo shaqa doon ah waatan fursado badan inoo abuurtay.

2.Dowladdu waxaa looga baahan yahay garab istaagida ganacstada Soomaaliyeed ayada oo Ka caawineyso badqabka xoolaha la dhoofinaayo, dowladdu sidoo kale waa in ay keento suuqyo badan oo ganacsiga Soomaaliyeed loo iibgeen karo taasina waxa ay dalka iyo dadka u horseedeysaa in dhaqaalihii uu kor u koco, noloshiina ay isbadasho iyo in dowladdu ay Ka hesho dhaqaalo badan oo dhanka canshuurta ayadana si ay ugu basho waxbarasho tayo leh oo faree ah iyo caafimaad.

WQ: Abdinaasir Yuusuf Aadan

## WAXBARASHADA GANACSIGA GASHAY GOORMUU DALKA KA BAXAYAA?



Burburkii Ka hor dalkeena soomaaliya waxuu ahaa dal isku tiirsan dhaqaalo ahaan taasi oo laga dheehan jiray in caafimaad oo dhan dalka uu ahaa mid beeso la'aan ah islamarkaana qofka uusan bixineenin wax dhaqaalo ah.

Sidoo kale waxa bilaash ahaa waxbarashada oo ay maamuleysay dowladdii militeriga laga soo bilaabo fasalka koobaad ilaa iyo heer jamacadeed taasina dalkeena soomaaliya waxa ay Ka dhigtay waxbarashada in tayadeed ay hori marto uu dalkeena noqodo meel aqoon ahaan hormarsan tahay.

taasi waxa ay keentay in dalkeena ay waxbarasho u soo doontaan qaar ka mid ah madaxda afrika soo martay.

Gacan ku haytii ay ku haysay dowladdii kacaanka waxbarashada dalkeena waxa ay Ka dhigatay mid aqoon ahaan hormarsan marka laga eego waxsoosaarka dalka uu lahaa sida Tacabka Beeraha, soo jalaabashada kalluunka, Warshadaha waxsoosaara iyo kuwa kale oo badan dhamaantood waxaa sabab u ah waxbarashada oo tayeeysaneed oo hal gacan ku jirtay balse aan laga raadineenin dhaqaale balse taasi badalkeeda waxaa laga raadinaayey aqoon yahano dalka iyo dadka anfaca.

Bur burkii Ka dib dalkeena Soomaaliyeed waxa uu galay xaalad hubinti la aan ah taasina waxa ay keentay in dalkeena waxkasta ay naga burburaan sida kaabayaasha dhaqaale, waxbarashada, caafimaadka , goobaha adeegga dadweynaha taasina waxa ay keentay in dalkeena uu noqdo mid shaqsiyaad gaar ah ay dhaqaalihii iyo waxbarashadii gacanta u galeen.

Waxbarashada waxa uu gacanta u galay ganacsto dooneysa macaash ay Ka sameeyaan waxbarashada ayaga oo aan eegeen tayada waxbarashada ay leedahay, in ay u dhameestiran yihiin qalabka waxbarashada balse taasi badalkeeda waxa ay waxbarashada iska noqotay mid liidata islamarkaana ay ardada Soomaaliyeed ku jahwareesan yihiin.

Sidoo kale ma jiro manhaj sax ah oo dagan oo ardada Soomaaliyeed wax lagu baro sidoo kale majiro qalabkii loogu tiragalay in ay ku sameeyaan tijaabooyin kala duwan taas oo Ka caawineysa ardayga in uu helo aqoontii oo itus oo itaabsii ah balse taasi badalkeeda waxaas waxkabadalan oo jid iyo jiho ay u socdaan lagaran la yahay ayaa loo dhigaa.

Ganacstada Ka macaashta waxbarashada qaarkood kaliya waxa ay eegtaan dhaqaalaha ka soo galaayo balse taasi badalkeeda halka uu eegi lahaa mustaqbalka ifaaye ee soo baxaaya in mustaqabalkoooda uu wanaajiyo waxa uu Ka door bidayaa in mustaqablkiisa uu god ku rido.

Hadaba goormee dalkeena Soomaaliyeed uu Ka baxaa waxbarashada ganacsiga?

Dalkeena soomaaliya waxa uu oga bixi karaa waxbarashada ganacsiga ah laba sheey oo kaliya ah.

1. Dowladda ayaa laga rabaa diyaarinta in ay diyaariso istiraatijiyad qaran oo kontonka sano ee soo socda lagu dhaqo oo dhanka waxbarashada ah ayada oo diyaarineyso manhaj mideysan oo laga soo bilaaba dugisiga hoos ilaa iyo heer jamacadeed

sidoo kale dowladdu waxaa looga baahan yahay diyaarinta goobaha wax lagu baran lahaa ayada oo walabeeneysa islamarkaana Ka dhigeysa goobaha waxbarashada kuwa u dhameestiran meeshii wax lagu baran lahaa , qalabkii wax lagu baraatikeen lahaa

dhanka kale dowladdu waxaa laga rabaa diyaarinta macalimeen u diyaarsan in ay mustaqbal ifaaya dalka u soo saaraan lana hubiyo macalimiinta aqoon ahaan, waaayo aragnimo macalin, xirfad ahaan dhamaan macalinka waxa ay Ka dhigeysaa mid soo saara arday tayo leh oo dalka iyo dadka wax u qabta.

Sidoo kale dowladdu waxaa looga baahan yahay bixinta mushaaraadka macalimiinta si looga maarmo waxbarasho lacag ah oo aan rayo laheen.

2. Shacabka Soomaaliyeed waxaa looga baahan yahay Ka shaqeenta garab istaaga dowladda ayaga oo ku garab istaagaayo bixinta canshuurta looga baahan yahay shacabka Soomaaliyeed sidoo kale waxaa looga baahan shacabka ilaalinta tayada waxbarashada iyo in ay ku kor joogteeyaan obad kooda waxbaranaayo taasina waxa ay keeneysaa in aan Ka baxno waxbarasho lacag ah oo bilaa tayo ah.

Ugu danbeyn shacabka Soomaaliyeed iyo dowladda waxaa looga baahan yahay isgarab istaaga iyo in laga guuleysto waxbarashada ganacsiga ah loona guuro waxbarasho tayo leh oo farii ah oo aan dhaqaalo laga raadineenin.

WQ: Abdinaasir Yuusuf Aadan

QUBANAHA QAWAARIIJTA

# GOD GASHAA AMA ARI RAACDAABA, GODKII WAA LAGUUGU SOO GALAY (WARBIXIN)

Ceelbuur waa magaalo kulansatay Qurux iyo hanaan wanaagsan marki aad eegto biyaha dur duraya ee dhex ceegaaga bartankeeda iyo jawiga u goonida ah oo ay leedahay, sidoo kale degmada Ceelbuur waxaa ku yaalo Xarunta ciidanka guutada 22 aad ee milatariga xoogga dalka Soomaaliyeed oo lagu magacaabo xarada Caano Moog, Degmadaan waa magaalo qadiimi ah, soo jireenkeeda taariikh ahaan waxa ay ka badan tahay 900 sano.

Ceelbuur iyo Galhareeri waa magaalooyinka kaliya ee ka hor inta aan la xoreyn loo diyaariyay Gargaar ka kooban cunto iyo daawo, maamul iyo ciidamo amni iyo guddiyo wacyigelin. Waxaa muuqato in dowladu muhiimad gaar ah u leedahay degmooyinkaas oo kamid ah meeliha ay AS ku xooganaayeen sanadihii lasoo dhaafay.

"Adeerkeey Mujaahid Xasan Sh Cumar Yaroow oo sideetan Jir ah waxa uu qoriga u sitaa in uu Khawaarijta suuliyo.Waxa uu fahamsan yahay in ay halis ku yihiin Diintiisa, Dadkiisa iyo Deegaankiisa. Khawaarij iyo Dadkeennu war iskuma hayaan. Ma waxay la tahay in ay Dadka heerkaas jooga ay uga adkaadaan dhulkooda oo inta ka suuliyaan ay iyagu u haraan!", sidaasina waxaa yiri:- Wasiir ku xigeenka Warfaafinta Cabdiraxmaan Yuusuf Cadaala, mar uu Magaalada Baxdo uga qeybgalay bandhig ciidanka deegaanka oo ka qeyb noqonaya dagaalka lagula jiro Khawaarijta.

Wasiirka Wasaaradda Awqaafta iyo arrimaha Diinta dowladda Federaalka Soomaaliya mudane Mukhtaar Roobow Cali Abuu-mansuur oo ay garab taagan yihiin qaar ka mid ah Culimaa'udiinka Soomaaliyeed ayaa sheegay in Wasaaradda iyo culimadu ay ka wada shaqeynayaan in la xoojiyo dagaalka dhinaca fikirka ah ee lagula jir kooxda Khawaajita ee dhaqamada diinta islaamka ka baxsan oo ku qaldaysa dadka caamada ah, si ay ugu dagaalamaan, wuxuuna xusay in culimadu ay si joogta ah u cadeynayso mas'alooyinka diiniga ah ee la xiriira dagaalka Khawaarijta, iyagoo dhinaca kale ka qeyb qaadanaya wacyigelinta bulshada iyo toosintooda oo ah shaqo ay mar walba u taagnaayeen culimada

Sheekh Bashiir Axmed Salaad ayaa dowladda Soomaaliyeed ku bogaadiyay inay mudnaanta koowaad ka dhigtay la dagaalanka Khawaarijta, taasoo suurad xumaysay diinta Islaamka, waana waajib si dadka Soomaaliyeed diintooda loo badbaadiyo. "Khawaarijtu waxay qatar ku yihiin diinta, nafta, maalka, cibaabada iyo guud ahaan xasiloonida dalkeena, waa waajib diini ah in lala dagaalamo" ayuu yiri Sheekh Bashiir.

Culimaa'udiinka Soomaaliyeed ayaa si adag uga hadlay dagaalka ka dhanka Khawaarijta waxaana ay sheegeen in loo baahan yahay in loo midoobo oo la garab istaago dagaalka u ku dhawaaqay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr: Xasan Shiikha Naxamuud ee looga xoreynayo dalka Argagixisada.

Barnaamij gaar ah oo ka baxay Warbaahnta dowladda oo ay ka qaybgaleen Culima'udiinka ayaa sheegay in loo baahan yahay in ay bayaaniyaan oo ay caddeyaan culimada xaqa iyagoo gudbinayay farriin ku aadan dagaalka loogu diyaar garoobayo in looga xoreyo qeybaha ay haraadiga ku yihiin Khawaarijta. "Khawaarijtu waxay qatar ku yihiin diinta, nafta, maalka, cibaabada iyo guud ahaan xasiloonida dalkeenna, waa waajib diini ah in lala dagaalamo" ayuu yiri Sheekh Bashiir.

Dhankiisa Sheekh Soomoow oo ka mid ahaa culimadii ka qeybgashay ayaa yiri,"Khwaarijtu Dadkeena waxay u laayeen si aan kala sooc laheyn, Maanta waa in Shacabka Soomaaliyeed Madaxda Qaranka ku garab istaagaan iska Xoreynta khawaarijta, waxaan haysataan Hoggaamiye daacad ah ee u istaagay, waana in aan garabkiis noqona, waana in culimada Soomaaliyeed ay xaqa caddeyso waana waajib saaran".

Sidoo kale Sheikh Cali Wajiis ayaa yiri "Shacabka Soomaaliyeed Waxaa Waajib ku ah inay Ajiibaan Jihaadka uu ku dhawaaqay naguna hoggaaminaayo Madaxweynaha Qaranka, waxay cadow ku yihiin dadka iyo diinta oo ay gaaleysiiyeen, waxay khatar galiyeen Amnigoodii iyo nabadgalyada, waxay baneysteen dadka xoolohooda iyo dhiiggooda,waa in la daldala oo jidka la dhigo dadka noocaas ah ee Khawaarijta ah, Ummadda waxaa waajib ku ah haddii xaakimka dalka ugu sarreeya u ku dhawaaqo in lagu jihaado cadawga ilaaheey iyo kan Ummadda waxaa waajib ah in aad ajiibto".

Wasiirka Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha diinta XFS Muqtaar Roobow Abuu Mansuur oo ay garab taaganyihiin culimada Soomaaliyeed ayaa sheegay in Wasaaradda iyo culimadu ay ka wada shaqeynayaan in la xoojiyo dagaalka dhinaca fikirka ah ee lagula jiro kooxda Khawaajita ee dhaqamada diinta islaamka ka baxsan ku qaldaysa dadka caamada ah.

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa dajisay Istiraatiijiyad ballaaran oo lagula dagaalamayo Khawaarijta, kaasi oo ka kooban dagaalka furimaha, dagaalka dhaqaalaha iyo dagaalka fikirka, iyadoo dhammaan dhinacyadaasi guulo wax ku ool ah laga sameeyey.

Dhinaca kale Afhayeenka Wasaaradda Gaashaandhigga dowladda Federaalka Soomaaliya Jeneral Cabdullaahi Cali Caanood oo xalay shir jaraaid ku qabtay magaalada Muqdisho ayaa sheegay in howlgal shalay ka dhacay Aagga degmada Galhareeri ee gobolka Galgaduud lagu dilay 30-dhagar qabe oo Khawaarijta ka tirsan, wuxuuna intaasi raaciyay in ciidamadda dowladdu ay dagaal ku qaadeen deegaannada Ceelbacad iyo lix irdood oo hoos yimaada degmooyinka Ceelbuur iyo Galhareeri, waxaana dagaalku uu ka dhacay Af-goobad oo khawaarijtu ku sugnaayeen, halkaasi oo looga dilay 30-dhagarqabe oo Khawaarijta ka tirsan.

Ciidamadda oo ka feejigan dhagarta Khawaarijta ayaa fashiliyay gaari qarax wada oo ay Argagixisadu dooneysay inay cutubyada ciidamadda dowladda ee dagaalka ku jira ku dhibaateeyaan, isagoo uu Afhayeenku xusay in sahan ay sameeyeen ciidamada sirdoonka Qaranka oo adeegsanada Aaladaha tiknoolajiyada in Shacabka ku nool deeggaanada shalay dagaalku ka dhacay inay fuliyeen amarka dowladda ee ahaa in laga fogaado goobaha ay ku dhuumaaleysanayaan kooxda nafla caariga ah ee Argagixisadda, waxaana xogta sahanka lagu sheegay in shacabku geedi ka yihiin deeggaanada ay ku gambanayaan Argagxisadda. Afhayeenka Wasaaradda Gaashaandhigga dowladda ayaa yiri " waad ku soo noqoneysan degmooyinkiinna idinka oo aanan la idinka qaadeynin xoolo baad ah, Sakawaad, lacag tabarucad ah iyo lacag jihaad, oo aan carruurtiinna qaraxyo lagu xireynin sidoo kalena aad xor tihiin".

Dagaalkan ayaa bilow u ah Istiraatiijiyadda qorsheysan ee sifeynta goobaha dagaalka, waxaana uu ka socda afar jiho oo kala ah dhanka bari, dhanka koonfureed, Waqooyi iyo dhanka Galbeed. Ciidamadda Dowladda ayaa afartaasi jiho ka soo socda sida uu sheegay Afhayeenka.

# CIIDANKA XOOGGA DALKA OO HOWLGALLO KA SAMEEYAY DEEGAANNO U DHEXEEYA HIIRAAN IYO GALGADUUD



Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed gaar ahaan guutada 26-aad ee Cali Binu Daalib ayaa howgallo ballaaran ka sameeyay tuulooyinka Ceel gorof , Ceel boorre iyo Geeddi koror oo u dhaxeeya xadka gobollada Hiiraan iyo Galgaduud.

Howlgalkan ayaa waxaa hoggaaminaayay taliyaha guutada 26 -aad ee Cali Binu Abii Daalib gaashaanle, Ismaaciil Cabdi Maalik Maallin, waxayna ciidamadu ku guuleysteen in ay isku furaan waddada xiriirisa Degmada Maxaas iyo Wabxo.

Ciidanka xoogga ayaa intay howlgalka ku jireen waxay waddooyinka qaar ay ka saareen miinooyin ay argagixisadu ku aaseen, iyadoo malleeshiyaadkii halkaasi ku sugnaana ay isaga carareen.

# HOWLGAL QORSHEYSAN OO LAGU KHAARAJIYAY 5 KHAWAARIJTA KA TIRSAN



Howlgal qorsheysan oo ciidanka Qaranka oo kaashanayaa saaxiibada hawlgalka Maraykanka ee Africom ayaa lagu dilay maleeyshiyaad ka tirsan khawaarijta.

Howlgalka oo xilli hore oo saakay ah ka dhacay goob 35km Koofur bari uga beegan Magaalada Galcad ee Gobolka Galgaduud, ayaa lagu dilay 5 dhagar qabe waxaana lagu burburiyey goob wayn oo fariisin u ahayd khawaarijta isla markaana ay ka wadeen ababul.

Ciidanka Qaranka oo kaashanaya saaxiibada Soomaaliya ayaa wada howlgalada lagu ciribtirayo kooxaha khawaarijta ee ku dhuumaalaysanaya deegaanada hawdka ah.

# DHAQANKA & SUUGAANTA

## TIXANAHA SHEEKADA MAANO FAAY (QEYBTA 52-AAD)

Waa Sheeko Jacayl ah waliba xiisa badan WQ: Dr, Maxamad Dahir Afrax




Leyla intay fursaddaas ka faa'iideysatay bay tiri, "Umaa, gebertan wixii sidaas la nakhatay ma kaseeysiin?"

"Ma kasi karo gabarteey. Kaas amar waayebee. Macallin waa u khabtay, warqaasaa loo dhigay, takhtar waa loo geeyey, si kasta waa loola hadlay, horlee u soo darseheesaa. Waxaaneyto cayuun aan u mudaas."

"Umaa waxaa dhan ma eh. Gebertaan wixii saas la nakhatay waxaa waaye; gebertaan Iikar ma rabto. Haddii lagu darana horlee u sii khafiifeesaa, usna waa ku dhibtoonaa, ma mudaayo in arooskaas lagu faa'iidaayo."

Aay-Caddeey, sidii qof meel nabar uga yiil laga taabtay bay intay soo jeesatay tiri, "Wallaahi an naftirkey igaarkaas ma u rabin, laakiin, adoogeedaa ku daray, an taladey haddii ahaa leheed, abtigeeda igaarkiis dhalay aan ku dari lahaa."

"Kaasna ma rabto ummaa."

Habartii intay dhabannada qabsatay, bay tiri, "Iihi, maxeey rabtaa, yaa u naas cad?"

"Igaarkoo kale, Axmed la dhahaayo ay jeceshahay," Leylaa qumbuladdii ay la gaatameysey ridday.

"Axmedaa! Axmedna yaas ahaay?" Aay-Caddeey baa tiri, intay yaab dhabannada la qabsatay indhahana taagtay.

"Yarkoo injineer eh waaye."

"Ijeerna intees naga soo galay, yaa noo dhalay! Iihi. Habartiisa maad kasee, adoogiis maad kasee? Waxaa la dhahay: wax la yakhaan aroos, wax la yakhaanaa lagu dhalaa!"

"Maya, laakiin, igaarkoo fiican waaye, ikhyaar eh, oo ciyaal suuq aheen, iidna waa u dhimaheesaa."

"Haah! Dulmiyaad raalli isugu tihiin miyaa! Kaas aaba ka soo jiibisay miyaa, aad ani ii keentay? Yac

intiid ka dhihi leheed aaba ka soo jiibihee miyaa? Yaa nii baray igaarka dadoow oo unnukaba kaseeyn?"

"Ummaa xaalkaas xaal oo sahal eh ma eh. Haddaba waa idiin sheegay. Walaasheyda aan la khasbin. Igaarka iida jeceshahay haddii loo diido oo koo kale lagu khasbo, ma noolaaheeso!"

"Adoogaa muggoo adlee ula tageey, ani afkey ma soo khabahaayo, aniyo usi shalay-maantaan tii ogaantoy ka dhacdayaa, abtigaada na heshiisiiyey. Muggoo ani lugteey ka bannaanka!"

Isla markii ay sidaas lahayd, ayaa waxaa soo galay Xaaji Muumin oo masaajidka ka yimid. Erayadii dambana maqlay. Leyla jawigii waa ka xumaaday. Qorshaheedu wuxuu ahaa in ay marka hore habarta qanciso, kaddibna labadoodu intay iskaashadaan odayga si deggan ula hadlaan. Laakiinse arrintii faraheeda way ka baxday.

Odaygii baa ku soo kadiyey, iyadoon weli ka tabaabushaysan. Intuu is-dultaagay buu yiri, "Maxaa waaye warka oo sheegowgiisa laga cabsahaayo?"Labadoodii intay is-dhugteen bay aamuseen. Tee ku dhiirran karta in ay u sheegto! In yar kaddib bay Aay- Caddeey intay gabadheedii mar kale eegtay ku tiri; iyadoo eedda iska duweysa, "U sheeg hee, adilee warka ma keeninoo?"

"Baaba wax oo sidaa u weyn maahin, wax-yar-lee waaye."

Leylaa intay geesinnimo iska baartay warkii bilowday, markay aragtay in ay joogto meel aan laga soo noqon karin. Waxay aabbaheed ugu soo celisay arrintii ay habarta u sheegtay. Keliya qodobkii ahaa inay Maana nin kale jeeeshahay, ayay si sarbeeb ah ugu sheegtay, in ay shaaca uga wada qaaddo way ku dhici wayday. Waxayse si geesinnimo leh ugu adkaysatay qodobkii ahaa in aan Iikar lagu khasbin. Xaaji Muumin intay ciiryaamo xanaaq wajigiisa ka soo soka martay, cabbaarna aamusay buu mar dambe hadal bilaabay; isagoo codkiisa caro kulul ka dhex shanqarayso, ereyadana carrabka ku cadaadinaya,

"Hoy Leyla i makhal! Wixii shirkaan minankaada kaa soo waday edebdarro waaye. Maana-Faay anaa dhalay, iida ma i dhalin, mana ii tashaheeso, anaa u tashahaa, gabarteyda waaye. Arooskeeda adna ma diidi kartid, iina ma diidi karto, qaf diidi kartana ma leh, arooska Abuukar aa u yaal. Abuukar aa aroosaa."

Intuu sii kululaaday buu raaciyey, isagoo taagti qaylinaya, Leylana farta ku fiiqaya, gacantana u ruxaya, "Nin kale warkiis ma ii keeni kartid, iina ma ii keeni karto! Haddana inta ka bax! Soco, wajigaada i doori aan ku dhahay!"

Leyla intay guuldarradii hoos ula hogatay bay boorsadeedii haab-haabatay. Aabbaheedna markuu

eraygii ugu dambeeyey xabbad ahaan ugu halgaaday buu gurigiisii horay ugu sii gudbay, isagoo wajigiisa weli dhimbilihii xanaaqu ka fanfaniinayaan, cod kii hore ka hooseeyana ku sii naqsanaya, "Edab-daranaa iyada! Iikar ma rabto. Iikar ma rabto!"

Leyla intay guuldarradii hoos ula hogatay bay boorsadeedii haab-haabatay. Aabbaheedna markuu

eraygii ugu dambeeyey xabbad ahaan ugu halgaaday buu gurigiisii horay ugu sii gudbay, isagoo wajigiisa weli dhimbilihii xanaaqu ka fanfaniinayaan, cod kii hore ka hooseeyana ku sii naqsanaya, "Edab-daranaa iyada! Iikar ma rabto. Iikar ma rabto!"

Maana-Faay aqalkii walaasheed bay murugo la dhex fadhidaa. Weli waxaa horyaal bakeerigii ay galabta shaaha casariyaha ku soo shubatay. Hal mar bay labta shaaha casariyaha halkiisii ku illowday.

*la soco qaybta xigta*

## SHEEKADII: LABA TUUG TALAA KA DHAXEYSA



Waa Saraaye iyo Sanceeye oo ah labo Tuug oo Riwaayadda ku jilaayey magacyadan iyo Xaaji Socdaal oo ahaa Nin dibadda ka yimid oo aan waxba kala soconin Sheekada muddo bandanna ku maqnaa dalka dibadiisa.

Labadan Tuug oo markii hore ahaan jiray kuwo ku shaqeysta d a r e y s k a Ciidamada oo ay wax ku dhacaan D a r i i q y a d a iyo Suuqyada dhexdooda ayaa waxaa dalka ka dhashay Dowlad, waxay kaloo Idaacadaha ka maqleen in Tuugada la qaban doono, markii ay sidaa maqleen waxay galeen shir deg deg ah oo ay uga tashanayaan qaab kale oo ay Magaalada ugu noolaan karaan mar haddii ay fashilantay farsamadii hore ugu qaraaban jireen.

Labadaasi Tuug waa Saraaye iyo Sanceeye, waxay in badan rogrogeen Taladooda, iyadoo mid waliba uu soo jeediyey Talo iyo waxay la aheyd, waxay arrinta rogrogaanba, mid wuxuu yiri: aan isaga baxno Magaalada in badan baan been been iyo Tuugnimo kusoo nooleyn si aanan u muteysan Xabsi iyo dhibaato kale ee aan Suuqqa Bakaaraha xamaali aan u doonano, sidaana aan ku maareeyno Nolosheena inta ka dhiman.

Kii kale ayaa wuxuu soo jeediyey war naga tag waligaa doqonnimo ayaa ku dishaye Rag ma tihide, waxaan ku moodaayey Nin Geesi ah, ma anigoo u jeeda Jawaan lacag ah iyo Dahab meel yaalla oo aan dhib u soo marin ayaad ileedahay Suuqa aadno oo aan soo xamaalno oo xoogsi iyo rafaad aan wax ku doonano, taasi ma ahan taladii aan kaa sugaayey ee mar kale u noqo wax kale oo aan qaadan karno sheeg Sanceeye ayaa sidaa yiri.

Saraaye ayaa mar kale hadlay oo wuxuu yiri: Talo walaalkii diide taraanturo ma huro, waxaa kaloo la yiri: waa la helay waa la helay lawaa baa ku xigta, walaalow Sancaayooy ha igu noqon maa angag aan waxba fahmeynin shalay waad maqlaysay Idaacadda iyo warka ka baxaayey ,Tuugo badan oo noocyo kala duwan isugu jira ayaa la xukumay, waliba waxaa ugu badnaa kiisaska xukunku ku dhacay qeybtii aan ku shaqeysaneynay ee Tuugnimada iyo dhaca Xoolaha Islaameed, iyadoo sii dheertahay Labiska Ciidamada iyo Hubkooda oo aan adeegsan jirnay dadkuna ku dhibaateyn jirnay.

Xaafadaha iyo Degmooyinka oo dhan ayaa nayaqaana dadkii aan dhaca u geysanay qaar ka mid ah ayaa jooga oo nayaqaan, sidaa daraadeed, ma garan karo aniga si mar kale noogu suura galeyso filamadaasi fashilmay ee waan ku celinayaa mar kale ma arko waxa aan ka aheyn inan Suuqa Xamaali u doonanao.

Sanceeye ayaa hadlay oo wuxuu yiri: waligaaba Saraayoow dhibaato iyo Talo diiddo ayaa ila daba socotay, waxaana ka mid ah dhibaatooyinkaaga Qof kastoo aad dhacdo waad sii deyn jirtay taasoo maanta keentay in aan ka baqno Suuqa, laakiin aniga Qof walboo aan dhac u geysto naftuna waan dhaafsiin jiray si uusan dib dambe iiga hor imaan, waliba waxaa jirta maah maah aan u cuskan jiray oo magaceeda la yiraahdo: Marxuum ma murmo laakiin, maanta Talo ka habboon ayaan hayaa taasoo ah sida reer Magaalku wax u dhaco.

waxay tahay Hubkii iyo Labiskii hore naga qari oo yaanan dib dambe loo arkin, wuxuuna sheegay hadda ka dib inay ka qaraab u doontaan Dekadda iyo Airportka, iyadoo Saraaye loo sheegay inuu isasuuxiyo mar kastoo lasalaamo oo waliba uu la kulmo Qof walboo lagu tuhmayo Hanti.

Saraaye ayaa salaan ku boobay Xaaji Socdaal oo Airportka kasoo dagey oo meelahaa Taksi ka deydayanaayo isla markiiba wuu isasuuxiyey ileen horey ayaa saaxiibkiis Sanceeye ugula taliyeye.

Sanceeye ayaa hadloo wuxuu yiri: waryaahe Xaaji Socdaal sididii iyo gacmo seyrin lahaane Ninkaanoo soconaaya inaad saartay Gacmaha kadibna uu sakaraaday ii sixiix Warqadaanoo Saldhigaana nagee.

Xaajigii oo aad iyo aad u naxsan iyo Sanceeye ayaa xagga Saldhigga u dareeray, ka dib wuxuu xaajiga hoos ugu sheegay Sanceeye in haddii arrinkan gaaro Saldhigga in uu dhibaato badan kala kulmayo oo isugu jira Xabsi iyo Baaris badan taasoo sababi karta inuu naftiisaba waayo, si aysan taa u dhicinna labadooda si hoose uga hesheeyaan xaajadan oo Lacag iska bixiyo asiguna Ninka meydkiis meesha ka qaado.

Xaajigii ayaa ka madax adeegay arrintii oo diiday in meel cidlo ah lacag ku bixiyo kuna adkeystay in Saldhigga lawada aado ileen wuu is hubaa in uusan wax dilin dhibna uusan geysan. Sanceeye ayaa talo ku cadaatay oo walwal lasoo darsay maadaama uusan heynin nin dhintay oo kaliya uu rabo in si been been ah wax kucuno, Ninka uu leeyahay waa la dilayna uu caafimaad qabo, haddii baaritaan la bilaabana arinta ay fashilmayso, ka dib maxaa dhacay? Lasoco qeybaha kale------ WQ: Abwaan Gabeyre

# DHALINYARADA IYO CIYAARAHA

## MERIH DEMIRAL OO KU BIIRAY KOOXDA AL-AHLI EE SACUUDIGA




Al Ahli ayaa si rasmi ah ugu dhawaaqday saxiixa Merih Demiral, kaasoo oo ay 20 milyan oo Yuuro uga soo iibsatay kooxda Atalanta. Ciyaaryahanka Turkiga ayaa saxiixaya heshiis ilaa June 2026-da .

Ciyaartoy badan ayaa sii wada in ay ku biiraan Boqortooyada Sacuudiga.kii ugu dambeeyay ee sidaas la sameeyo waa heshiiska Merih Demiral. Daafaca Turkiga ayaa ka tagay Atalanta wuxuuna ku biiray mashruuca dhaqaalaha badan leh ee Al Ahli.Kooxda Al Sacuudiga ayaa habeenimadii axadda ku dhawaaqday saxiixa daafaca. Isaga oo 25 jir ah, Demiral waxa uu ka tagay laba xilli ciyaareed oo uu ku qaatay Atalanta, halkaas oo uu uu samay 70 kulan, 3 gool dhaliyey wuxuuna sameeyay 2 caaawin.

Al Ahli waxay hadda haysataa ciyaartoy kale oo kubbadda cagta Yurub ah oo ay weheliyaan Edouard Mendy, Roberto Firmino, Kessie, Allan Saint-Maximin, Riyad Mahrez iyo Roger Ibanez.

## NICOLO ZANIOLO OO KA TAGAY KOOXDA GALATASARAY KUNA BIIRAY ....



Nicolo Zaniolo waxa kaso soo dhaqaaqay kooxda Galatasaray waxa uu amaah ugu biiray Aston Villa. Unai Emery ayaa filaaya inuu daboolo booska xiddiga reer argentine ee Emi Buendia, kaasoo dhaawac halis ah ka soo gaaray tababarka todobaadkii hore; Buendia ayaa qarka u saaran in uu ym seego inta badan xilli ciyaareedkan . Aston Villa ayaa dhamaystirtay saxiixa xiddiga khadka dhexe ee Galatasaray Nicolo Zaniolo. 24-sano jirkaan wuxuuna noqonayaa saxiixii afaraad ee kooxda Villa ay sameyso xagaagan. Laacibkan ayaana kooxda la qaaday horyaalka turkiga xilli ciyaareedkii hore , Zaniolo ayaa horumar ka sameeyay AS Roma markasuu kula guuleystay UEFA Europa Conference League 2022.

## MACALIM TEN HAG OO SOO FOOD SAARTAY CABSI XOOGAN





Macalimka kooxda Man United ayaa xaqiijiyay in Van de Beek iyo Williams ay ka tagi karaan kooxda ayuu warbaahinta usheegay in macquul tahay labaddan xiddig ay xagaagan ka dhaqaaqi karaan garoonka Old Trafford ayaa carabka ku dhuftay mar uu ka hadlaayey shirkiisa jiraa'id kulankii sabdii ay la ciyaareen kooxda Tottenham guushana ku raacday 2:0 ayaa yiri " way iska caddahay inay wax kale raadinayaan" taaso ka dhigan tahay mustaqbalka labaddan laacib kaga dhamaatay kooxda Man United. Ilaa axadi waraka suuqa kala iibsaga ayaa diiradda sarnaa mustaqbalka da'a yartaan.Wararka ka imaanaaya dhanka Van de Beek ayaa lagu soo waramayaa inuu ku biiro karo kooxda ka dhisan dalka Isbaanishka ee Real Socieded .waxaa sidaas tabineyso wakaaladda wararka ee MUNDO DEPORTIVO. Dhan kale xiddiga reer Norway williams ayaa lasoo warinayaa in uu doonaya in uu baxo ,balse xiddigan kaso baxay Akadeemiyadda kooxda Manchester United ayaa usbuucyaddi laso dhaafay lala xariirinayey kooxda Leeds United inta uusan Ten Hag soo hadal qaadin Williams.

## AL-HILAAL OO LASO WAREEGTAY XIDDIG MUHIIM U AH




Aleksandar Mitrovic ayaa ku biiray kooxda ka ciyaarta ee Saudi Pro League ee Al-Hilal isaga oo kaga soo biiray Fulham. kooxda Premier League ka dhisa ee Fulham ayaa ku sheegtay saxiixaan yahay "qiimihii ugu badnaa ee suuqa kala iibsiga ciyaartoyda ee kooxda Fulham ". Weeraryahanka reer Serbia ayaan ka mid ahayn kooxdii Fulham guuldaradii 3-0 ee ka soo gaartay Brentford sabtidii.

28-jirka Neymar ayaana kula biiri doona dhanka weerarka kooxda Al-Hilal, ka dib markii uu xiddiga reer Brazil u soo dhaqaaqay horyaalka sacuudiga Khamiistii. Fulham ma aysan shaacinin lacagta balse waxaa lagu soo waramayaa in ay heli doonta maal addun oo garaaya $50 milyaan oo ganni ah Ku dhawaaqista heshiiska, kooxda ayaa sheegtay inay si cagajiid ah u aqbashay dalab dib u eegis lagu sameeyay maadaama ciyaaryahanku uu si joogta ah u sheegay rabitaankiisa ah inuu baxo. Mitrovic ayaa noqon doona saxiixii 3-aad ee Al-Hilal kasoo iibsadaan xagaagan horyaalka Premier League kadib daafaca Chelsea Kalidou Koulibaly iyo khadka dhexe ee Wolverhampton Wanderers Ruben Neves. Ciyaaryahanka ay isku dalka yihiin Sergej Milinkovic-Savic ayaa sidoo kale Al-Hilal kaga soo biiray Lazio, halka weeraryahankii hore ee Barcelona Malcom ay kala soo wareegeen Zenit St Petersburg. Mitrovic, oo 205 kulan u saftay Fulham, una dhaliyay 111 gool ka dib markii uu kaga soo biiray Newcastle United 2018-dii.

## ZIYECH OO ISKA XAADIRIYEY HORYAALKA BOQORTOOYADA SUCUUDI CARABIYA



Hakim ZiyechAyaa ka tagay kooxda Chelsea .U dhaqaaqista PSG bishii Janaayo ayaa burburtay sababo la xiriira qiimaha uu ugu baxi karaayo garoonka StamfordBridge sido Ziyech ayaa dalabkiisii labaad dalbaday u dhaqaaqista Al Nassr ee Saudi Pro League ka dhisan horaantii xagaagan heshiis ayaana noqday mid burburay sababo la xiriira dhaawac laacibka kaso kulamo saxibtinimo uu xulkiisa u ciyaarey. Ziyech ayaana baaritaannada caafimaadka u maray kooxdiisa cusub ee Galatasaray asigoo qalinka ku duugay heshiis hal xilli ciyaareed ah ,kooxda waxaa u furan ikhtiyaar ay ku iibsan karaan marka uu dhamaado heshiiskaasi.

Ziyech wuxuu yimid Chelsea xilligii karoona feyriskii 2020-ka . Ziyech ayaana kooxda Chelsea la qaaday kobaab muhiim aha oo ay ku jiraan Champions League, UEFA Super Cup, iyo FIFA Club World Cup, wuxuu si weyn ugu guuldareystay inuu ka soo baxo wixii laga filayey xilligii uu joogay kooxda Ajax.

## PAQUETA OO LAGA SAARAY XULKA QARANKA EE BRAZIL



Xiddiga khadka dhexe kooxda West Ham United ayaa laga reebay xulka qaranka Brazil, kaaso aan ka qayb gali doonin isreeb reebka koobka ee bisha soo socota . Wararka ayaa intaasi ku daaray in xiddigan uu jabiyeey sharciga FA-ga iyo kan FIFA .tababarahe Fernando diniz ayaa sheegay in uu daqiiqadihii ugu dambeeyay ka reebay liiska xulka qaranka ayaa yiri " waxan ugu reebnay shaxda qaranka wilkeena Paqueta si uu uso xaliyo khilafka tagaan".

# WARBIXINTA TODDOBAADLAHA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



1-Hawlgalada milateri ee dhameystirka wejiga 1aad ee dagaalka ka dhanka ah Khawaarijta oo si habsami ah uga socda gobollada dhexe ee dalka, iyadoo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ay soo hoyeen guulo hor leh.

2-Beelaha ku dhaqan gobollada dhexe oo Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud u ballanqaadey inay si buuxda uga qeyb qaadanayaan dagaalka ka dhanka ah Khawaarijta Al Shabab, mar uu Madaxweynaha beelahaasi kula kulmey magaalada Dhuusamareeb.

3-Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo kala hadlay Wakiilka Qaramada Midoobay Marwo Catriona Laing ee Soomaaliya qorshaha xasilinta deegaannada la xoreeyay.

4-Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo ku adkeeyay shacabka Galmudug inay gacan weyn ka geystaan dhameystirka haraadiga Khawaarijta ee gobollada dhexe ku sugan, mar uu ka hadlayey xafladda sannad guurada 17aad ee aasaaska Dowlad Goboleedka Galmudug oo ka dhacay magaalada Dhuusa Mareeb.

5-Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud oo xarigga ka jarey laanta cusub ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ee magaalada Dhuusamareeb.

6-Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo Golaha Wasiirada Galmudug kula dardaarmey dardar gelinta dagaalka ka dhanka khawaarijta.

7-Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo la dardaarmey Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee ka qeybgalaya hawlgalada lagu xoreynayo degmooyinka Galhareeri iyo Ceel-Buur ee gobolka Galgaduud.

8-Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xamsa Cabdi Barre ayaa u magacaabay Mudane Cabdullaahi Maxamed Nuur inuu noqdo Agaasimaha Guud ee Xarunta Qaran la Dagaalanka Fikirka Xag Jirka ah eeTubsan.

9-Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Barre oo ka qeybgaley xaflad lagu soo bandhigayey sidii guusha ahayd ee ay ku soo dhammaatey gudashada Xajka ayaa sheegay in dowladda ay ka shaqeyneyso sidii hoos loogu dhigi lahaa qiimaha Xajka.

10- Ra'iisul Wasaarae Xamsa Cabdi Barre, ayaa ka qeyb galey kulan waxbarasho, sheegayna in bahda waxbarashadu ay yihiin naftood hurayaal xili adag u kacay waxbaridda ubadka Soomaaliyeed.

11- Ra'iisul Wasaare Ku-Xgeenka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Saalax Axmed Jaamac, ayaa dhagax dhigay dhismaha xarunta Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Diinta oo Muqdisho laga dhisayo.

12-Shirka Golaha Wasiirada oo lagu ansixiyey Hindise Sharciyeedka Xuquuqda Carruurta Soomaaliyeed.

13-Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa soo bandhigto deeq Waxbarasho heerka PhD, oo uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud ugu deeqay in ay ka faaiidaystaan aqoonyahanka Soomaaliyeed.

14-Ciidamada Xoogga Dalka oo cagta mariyay inta badan saldhigyadii Khawaarijtu ka soo duulaan tegi jirtay ee inta u dhaxaysa gobollada Galgaduud iyo Shabeelaha dhexe.

15-Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo kaashanayaa saaxiibada hawlgalka Maraykanka ee Africom ayaa Degmada Galcad ee Galgaduud ku dilay 5 xubnood oo ka tirsanaa Khawaarijta.

16- Ciidanka Kumaandooska Danab oo deegaanka Janaay Cabdalle ee gobolka Jubada Hoose ku dilay 7 xubnood oo ka tirsanaa Khawaarijta.

17-Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ayaa deegaanka Buulo Fulaay ee Gobalka Bay ku dilay 23 maliishiyaad oo ka tirsanaa Khawaarijta Al Shabab.

18-Ciidanka Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka (NISA) oo deegaanka Ceelasha-Biyaha ee duleedka Muqdisho ku dilay dhagar-qabe ka tirsan Khawaarijta Al-shabaab oo watay gaari ay ku soo rareen waxyaabaha qarxa

19- Madaxweynaha Hirshabelle Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen Guudlaawe ayaa bogaadiyay howlgallada ka dhanka ah Khawaarijta ee ka socdo degaannada Hirshabeelle.

20-Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Soomaaliya Mudane Xasan Macallim Maxamuud oo magaalada Dhuusamareeb ka wada kulamo ku saabsan abaabulka dagaalka ka dhanka ah Al Shabab.

21- Wasaaradda Gaashaandhigga oo mar kale u digtay shacabka ku nool deegaannada ay ku sugan yihiin Khawaarijta in ay ka fogaadaan meelaha ay gabbaadka ka dhiganayaan cadowga.

22-Shirka Wasiirada Maaliyadda ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada oo Muqdisho ka dhacay ayaa laga soo saaray war murtiyeed ku aaddan xoojinta iyo horumarinta hay'adaha dowliga ah iyo kobcinta dhaqaalaha.

23- Wasiirka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Soomaaliya Mudane Xasan Xuseen Maxamed ayaa Muqdisho ka daah-furay shir looga hadlayay arrimo la xiriira ceymiska xoolaha dalka.

24-Soomaaliya iyo Kenya oo kala saxiixday heshiis la xiriira iskaashiga duulista hawada ee labada dal.

25-Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Soomaaliya Mudane Axmed Xasan Aadan ayaa furay shir wadatashi ah oo u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo wasaaradaha Kaluumeysiga ee Dowlad Goboleedyada dalka.

26-Wasiirka Dhallinyaradda iyo Ciyaaraha ee Soomaaliya Mudane Maxamed Barre ayaa hortagay xildhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamanka si su'aalo loo weydiiyo.

27-Laba Xubnood oo ka tirsanaa Khawaarijta ayaa isku soo dhiibay iidanka dowladda ee ku sugan Diinsoor.

28-Ciidanka Booliska ee Muqdisho oo gacanta ku soo dhigay eedeysane dil u geystey ganacsade caan ah.

29-Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Musiiboyinka Qaranka Soomaaliyed ee SODMA Mudane Maxamuud Macalim Cabdulle ayaa magaalada Dhuusamareb ka furay Shirka Madasha Arrimaha Bini'aadamnimada ee Galmudug..

30-Maxkamada Gobolka Banaadir ayaa wali wadda dhageysiga dacwad musuqmaasuq oo loo heysto saraakiil ka tirsan hay'adaha dowladda.

31-Maxkamadda Gobolka Banaadir oo 10-sanno oo xabsi ah ku xukuntay nin sixir iyo dhagar kale ku qaraabanayay.

# SHARCIGA ISTAATISTIKADA QARANKA

Qodobka27aad Gunnooyinka Maamulka

iyo Shaqaalaha Hay'adda

Istaatistikada Qaranka

1.Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, ku-xigeenkiisa, shaqaalaha maamulka iyo kuwa aan maamulka kamid aheyn ee Hay'adda Istaatistikada waxay yeelanayaan gunnooyin waafaqsan habka Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliya.

Cutubka 6aad

Awoodaha Haya'dda Iyo Ururinta Xogta

Qodobka28aad Ururinta Xogta Istaatistikada

1. Haya'ddu waxay awood u leedahay soo ururinta xogta Istaatistikada Qaranka ama in ay dib-u-soo celiso arrin kasta oo lagu caddeeyey jadwalka 1aad ee Xeerkan.

Qodobka 29aad Tiro-koob

1.Wasiirka qaabilsan Istaatistikada, isagoo ka talo qaadanaya Golaha Maamulka Istaatistikada wuxuu amar ku bixin karaa isagoo ku baahinaya warbaahinta in la qabto tiro-koob gobol ama degmo ka tirsan dalka, amarkaasna waa in uu caddeynayaa:

a)Maalmaha la qabanayo tiro-koobka; iyo

b)Dadka (Howlwadeenadda) iyo hay'adaha ka qeyb qaadanaya iyo ujeedooyinka tiro-koobka loo qabanayo.

Qodobka 30aad

Sahamada Tiro-koobka

1.Agaasimaha Xafiiska Haya'adda Istaatistikada wuxuu qaban karaa in laga sameeyo Soomaaliya ama meelo kamid ah dalka sahamo aan ahayn tiro-koob sida ku cad Qodobka 31aad ee Xeerkan, xog-ururin laga sameynayo Soomaaliya oo aan aheyn tiro- koob iyo ururinta xogta Istaatistikada xiriirka la leh sida ku cad jadwalka 1aad ee Xeerkan.

2.Xogta macluumaadka la soo ururinayo waa la soo bandhigayaa iyadoo la-tixgelinayo wixii la xiriira xogta la-ururinayo laguna sheegay faqradda (1) ee Qodobkan, waqtiga sahamada la qabanayo iyo sida loo qabanayo waxaa go'aaminayo Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada.

Qodobka 31aad

Tiro-koobka iyo Sahanka

ay Sameeyaan Hay'adaha Kale

1.Dhammaan isku dayada ay hay'adaha Dawladdu ku doonayaaan inay ku qabtaan tiro-koobyo ama sahamo waddanka gudihiisa laga qabanayo waa inay wada shaqeyn kala yeeshaan Haya'dda Istaatistikada Qaranka.

2.Dhammaan iskudayada ay hay'daha kale ee aan dawliga aheyn ay ku doonayaaan inay ku qabtaan tiro-koobyo ama sahamo heer Qaran ah waa in ay ka helaan oggolaanshaha Hay'adda Istaatistikada.

3.Goluhu wuxuu, isagoo la tashanaya Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada sameyn karaan xeerar ku saabsan hababka la raacayo arrintaan, iyadoo la eegayo qoraalada la gudbiyey sida ku cad faqradda (1) ee isla Qodobkan.

4.Iyadoo la eegayo sharcigan, tiro-koob iyo sahan heer Qaran ah kuma jiraan:

b) Sahamada Istaatistikada gudaha ee ay qabtaan Wasaaradaha Dawladda;

t) Tiro-koob ama sahan ay qabtaaan hay'ado gaar ah ayna ku lug-leeyihiin danneeyayaal sida Wasaaradaha Dawladda ama kuwa gaar ah;

j)Sahamo laga sameeyo suuqyada laguna ogaananayo badeecadaha ay dadku isticmaalaan ama lagu ogaanayo wax soo saarka shirkado.

x)Sahamo Istaatistikada ay qabanayaaan dadka ama haya'daha la soo xusay.

Qodobka 32aad

Xiriirka Ka Dhexeeya Hay'adda Istaatistikada iyo Hay'adaha Kale

*LA SOCO QAYBTA XIGTA*

SONNA WAKAALADDA WARARKA QARANKA SOOMAALIYEED وكالة الأنباء الوطنية الصومالية